

رسالة
الدلائل في حكم موالاة أهل
الإشراك

للشيخ
سليمان بن عبد الله بن محمد بن عبد
الوهاب

وترجمة معانيه إلى اللغة الصومالية

بقلم
محمد آدم إبراهيم {شاكر}

Shaakir123@hotmail.com

Magaca Risaalada: Ad-dalaa'il fii xukmi mawaalaati
.Ahlil ishraak

Qoraha Risaaladaani waa : Ash-sheeykh Suleymaan
Ibnu Cabdallah Ibnu Muxammed Ibnu Cabdilwahaab
.At-Tamiimii

.Wuxuu dhashtay: 1200 hirjiyada

Wuxuuna dhintay 1233 hijriyada. Kitaabkaan uu

Sheekhu qoray waa kitaabka ugu qiimaha badan

uguna wanaagsan kutubta ka hadasha mawdhuuca uu

ka hadlay kitaabkaan , mawdhuuca uu kitaabkaani ka

:hadlaayo waa laba Arin oo kala ah

Qofka Muslimka ah oo ay Gaalo ku soo duusho :1

.wadankiisa maxaa la gudboon

Xukunka qofka keena gaaladaasi soo duushay ama :2
ugu gar gaara ama ku taageera sidii ay wadanka ku sii
.joogi lahayd

Sheekha wuxuu kitaabkaani ku keenayaa (uu ku soo
qaatay) 21 Daliilood oo Aayado Qur'aanka Kariimka ah
iyo hal Xadiith oo ah Daliilka 21aad waana sidaa
sababta kitaabkaani loogu bixiyay magaca ah Ad-
dalaail in kastoo ay Culimada qaar ay in Faciil lagu
jamciyo Facaa'il ay wax ka yiraahdaan xaga luuqad
.ahaaneed

إعلم رحمك الله:

:Ogoow Allaah kuu naxariisayee

أن الإنسان إذا أظهر للمشركين الموافقة على دينهم،
in Insaanka (qofka muslimka ah ayuu sheekha ula
jeedaa meeshaan) hadii uu u muujiyo Mushrikiinta
inuu ku raacsan yahay Diinkooda (waxa ay Dhaqan ka
,dhigtaan Gaalada)

خوفاً منهم،

Cabsi uu ka qabo (weliba uu sidaasi u sameeyo)
Mushrikiinta(dabcan waa cabsi aan gaarsiisnayn
,Qasab/ikraah)

ومداراة لهم، ومداهنة لدفع شرهم،

iyo meer meerin uu ayaga meer meerinaayo, iyo maro
geed saarid (u been guurid) uu u sameenaayo si uu
isaga gaashaamo dhibaataadooda(mudaaraad iyo
mudaahana way kala duwan yihiin macna ahaan sida
uu sheekha dib ka sheegi doono, mudaaraat waa
hantidaada aad ku bixisid sidii aad u ilaashan lahayd
Diintaada, mudaahana na waa hantidaada ama
naftaada ama jagadaada oo aad ilaashataa adiga oo ka
tanaasulaayo Diintaada ama wax ka mid ah , balse
,meeshaan way isku macno dhawyihiin)

فإنه كافر مثلهم

,qofka sidaasi sameeya waa Gaal ayagoo kale ah

وإن كان يكره دينهم ويبغضهم،

haba ahaado mid (qalbiga) ka neceb Diinkooda colna
,la ah Gaalada

ويحب الإسلام والمسلمين.

Islaamka iyo Muslimiintana (Qalbiga) ka jecel (waa
,Gaal gaalada la mid ah)

هذا إذا لم يقع منه إلا ذلك،

Kani (Gaalnimadaani uu qofka ku dhacay) waa hadii
aysan ka dhicin qofka (uusan la imaanin) wax aan
arinkaasi ahayn (intii la soo sheegay oo kaliya hadii ay
ka dhacdo oo uu la yimaado qofka wuu ku
gaaloobayaa hadii uu wax kale oo intaa ka dheerna la
,yimaado darajadii gaalnimada uun baa u sii korortay)

فكيف إذا كان في دار منعة،

Waa sidee (ka waran xaalka iyo xukunka) hadii Asigoo
ku sugan oo dhex jooga Daar uu awood ku leeyahay
(mukulaal mininkeeda joogta mici libaax ayay
,leedahay asigoo sidaasi la mid ah)

واستدعي بهم،

,uu u yeerto (u qaylo dhaansado) Gaalada

ودخل في طاعتهم،

uuna u galo Daacadooda (hogaankooda, Taliska
,gaalada uu hoos yimaado)

وأظهر الموافقة على دينهم الباطل،

,muujistana inuu ogol yahay Diinkooda Baadilka ah

وأعانهم عليه بالنصرة والمال،

uguna kaalmeeyo Diinkooda (la garab istaaga) Hiil iyo
Hooba (Naf iyo Nafciba ama Dad iyo Duunyaba la
,garab istaago)

ووالاهم

kana sukeeyo dhigtay (Saaxiib, Garab, Gacal iwm ka
,yeesha)

وقطع الموالاة بينه وبين المسلمين،

xarigana u jara Gacaltooyadii ka dhexeesay Asiga iyo
,Muslimiinta (kale)

وصار من جنود القباب والشرك وأهلها

kana mid noqday (oo safkoodii galay) Ciidankii
,Qubadaha iyo Shirkiga iyo ehelkeedaba

بعد ما كان من جنود الإخلاص والتوحيد وأهله؟!

ka dib markii uu (hore) uga mid ahaa (uga tirsanaan jiray) Ciidankii ikhlaaska iyo Tawxiidka iyo ehelkiisa (qofkaani xaalkiisa iyo xukunkiisa ka warama)? (shaki kuma jiro waa kii hore oo wax badan lagu daray)!
,(Allaaw xaqqa nagu sug ilaa aan kaala kulano Aamiin)

فإن هذا لا يشك مسلم

midkaani (Qofka hada arinkiisa laga soo sheekeeyey) kama shakinaayo Qof muslim ah

أنه كافر من أشد الناس

inuu qofkaasi yahay Gaal midka Dadka ugu daran

عداوة لله تعالى ورسوله صلى الله عليه وسلم،

Cadaawaha Allaah kor ahaayee (Alle la coleeytanka) iyo Rasuulkiisa scw

ولا يستثنى من ذلك إلا المكره،

lagamana soo reebaayo arinkaasi (wax yaabaha Gaalnimada loogu dhaco) qof la dirqiyay oo la qasbay ,mooyaanee

وهو الذي يستولي عليه المشركون فيقولون له:

waa midka ay qabsadaan (midka la qasbayna)

:(gacanta ay ku dhigaan) Mushrikiinta kuna dhahaan

اكفر، او أفل كذا،

,gaaloow (Gaal noqo) ama sidaas sameey

وإلا فعلنا بك وقتلناك،

hadii aadan sameenina (waxa aan ku amreeno) wax

,baan kugu sameeneenaa waana ku dileenaa

أو يأخذونه فيعذبونه حتى يوافقهم،

ama intay qabtaan oo ay ciqaabaan ilaa uu ogolaado

,(waxay ka rabaan oo gaalnimo ah)

فيجوز له الموافقة باللسان مع طمأنينة القلب بالإيمان.

qofkaasi waxaa u banaan inuu afka ka ogolaado

(gaalnimada ay ku qasbaayaan) iyadoo qalbigiisu ku

.xasilan yahay (ku degan yahay) iimaanka

وقد أجمع العلماء

Waxay isku wada raaceen Culimada

على أن من تكلم بالكفر هازلاً،
in Qofkii ku hadla Gaalnimo asigoo kaftamaayo (si
dheel dheel ah qofkii wax gaalnimo ah ugu hadlo)
أنه يكفر،
,inuu gaaloobaayo (qofkaasi)

فكيف بمن أظهر الكفر
Waa sidee (xaalka iyo xukunka) qofka muujistay
خوفاً وطمعاً في الدنيا؟!
Gaalnimo (ayna u geysay) Cabsi ama Damac Aduunyo
!? (quud dareen Aduunyo/ Aduunyo jaceel)
وأنا أذكر بعض الأدلة على ذلك بعون الله وتأييده.
Waxaana sheegayaa qaar ka mid ah Adilada arinkaasi
(wax yaabaha lagu gaaloobaayo) ku saabsan anigoo
.kaalmeesanaayo Kaalmada Allaah iyo Taageeridiisa

الدليل الأول: قوله تعالى:
:Daliilka koowaad: waa Qawlkaa Allaah koreeyee
{ولن ترضى عنك اليهود ولا النصارى
kaa raali noqon mayso Yahuuda iyo Nasaaradaba }
(kaa raali noqon maayaan)

حتى تتبع ملتهم } .
ilaa aad ka raacdid Diinkooda (aad mab da'ooda ku
:{raacdid oo aad qaadatid
فأخبر تعالى أن اليهود والنصارى، وكذلك المشركون،
Allaah koreeyee wuxuu sheegay in Yahuuda iyo
,Nasaaradaba, iyo sidoo kale Mushrikiinta
لا يرضون عن النبي صلى الله عليه وسلم
aysan raali ka noqonaynin Nabiga scw
حتى يتبع ملتهم، ويشهد أنهم على حق،
ilaa uu ka raaco Diintooda, una qiro (u marqaati kaco)
,inay Xaq ku dul taagan yihiin
ثم قال تعالى: {قل إن هدى الله هو الهدى

Ka dib Allaah koreeyee wuxuu yiri:{waxaad dhahdaa
,(Nebiyow) Hanuunka Allaah uun baa Hanuun ah
ولئن اتبعت أهواءهم بعد الذي جاءك من العلم

hadii aad raacdid (Nebiyow) Kuwaasi hawadooda, ka
,dib markii uu kuu yimid Cilmiga
مالك من الله من ولي ولا نصيب،

Allaah xagiisa kaagama sugnaanin (kuma lihid) Gacal
,{iyo Gar gaare
وفي الآية الأخرى: {إنك إذا لمن الظالمين،}

Aayad kalena waxaa ku sugnaa: { waxaad markaasi ka
,mid tahay Daalimiinta (Gaalada)
فإذا كان النبي صلى الله عليه وسلم، لو يوافقهم على
دينهم

hadii uu Nebiga scw ku waafaqi lahaa (ku raaci lahaa)
Gaalada Diinkooda
ظاهراً من غير عقيدة القلب،

muuqaalka kore (xaga kore) iyadoo uusan qalbiga ka
,rumeesnayn

لكن خوفاً من شرهم ومداھنة،
balse (uu sidaasi u sameeyo) Cabsi uu Shartooda ka
,cabsanaayo iyo meer meerin

كان من الظالمين،
,uu ka mid noqon lahaa Kuwa gar darooday (Gaalada)
فكيف بمن أظهر لعباد القبور والقباب

ka waran (sidee ayuu noqonayaa Xukunka) qofka u
muujiyay kuwa Qabuuraha caabuda iyo Qubadaha
أنهم على حق وهدى مستقيم؟!
!inay xaq ku dul sugan yihiin iyo hanuun toosan
فإنهم لا يرضون إلا بذلك.

.ilayn si aan sidaasi ahayn ku raali noqon maayaanee
الدليل الثاني: قوله تبارك وتعالى:
Daliilka labaad: waa Qawlkaa Allaah barako badnaayee
:kor ahaayeen

{ولا يزالون يقاتلونكم}

kama tagaan (oo kama joogtsadaan Gaalada) inay }
idin la dagaalaan

حتى يردوكم عن دينكم إن استطاعوا

ilaa ay dib idinkaga celiyaan Diinkiina (Islaamka) hadii
,ay awoodaan (inay dib idinkaga celiyaan Diinkiina)

ومن يرتدد منكم عن دينه

Qofkii dib uga noqda Diinkiisa ee idinka mid ah

فيمت وهو كافر

kuna dhinta asigoo Gaal ah

فأولئك حبّطت أعمالهم في الدنيا والآخرة

kuwaasi (kaas iyo wixii la midka ahba) way hoobatay
,Acmaashoodii Aduun iyo Aakhiraba

وأولئك أصحاب النار هم فيها خالدون.

kuwaasina waa Naarta Dadkeeda waana kuwo ku dhex
. {waaraayo (Naarta)

فأخبر تعالى أن الكفار لا يزالون يقاتلون المسلمين

Allaah koreeyee wuxuu sheegay in Gaalada aysan ka
tageenin (ka joogsaneenin, ka suuleenin) inay la
dagaalamaan Muslimiinta

حتى يردوهم عن دينهم إن استطاعوا،

ilaa ay dib uga celiyaan Muslimiinta Diinkooda hadii
,ay karaan (oo ayba u suuroobeeso)

ولم يرخص في موافقتهم

mana rukhseenin Allaah in Gaalada la waafaqo (la
ogolaado waxay wataan)

خوفاً على النفس والمال والحرمة،

iyadoo loo cabsanaayo Nafsada iyo Maalka iyo
,Dumarka

بل أخبر عمن وافقهم بعد أن قاتلوه

bal wuxuu sheegay Allaah Cidii waafaqda (ogolaata)
Gaalada (waxay wataan) ka dib markii ay la diriireen

ليدفع شرهم أنه مرتد،

inuu (waafaqida uu waafaqayna ay ku salaysan tahay)
iska gaashaamo Shartooda (wuxuu Allaah sheegay)
,inuu Qofkaasi yahay Murtad

فإن مات على ردة بعد أن قاتله المشركون

hadii uu ku dhintana isagoo ku sugan Ridadiisa ka
dib markii ay la diriireen Mushrikiinta

فإنه من أهل النار الخالدين فيها،

inuu yahay Ahlu Naar (Naarta dadkeeda) oo weliba ku
,waaraayaan dhexdeeda

فكيف بمن وافقهم من غير قتال؟!

Waa sidee (ka waran xaalka iyo xukunka) Qofka
!waafaqay Gaalada Dagaal la'aan

فإذا كان من وافقهم بعد أن قاتلوه لا عذر له،

Hadii qofkii gaalada waafaqay ka dib markii ay la
,dagaalameen uusan lahayn Cudur daar

عرفت أن الذين يأتون إليهم

Waxaad garanaysaa(oo aad fahmeesaa) in kuwa u
imaanaaya (u tagaaya) Gaalada

يسارعون في الموافقة لهم

ayagoo u soo deg degaayaan siday u waafaqi
lahaayeen

من غير خوف ولا قتال،

,Cabsi la'aan iyo Dagaal la'aan

أنهم أولى بعدم العذر،

inay kuwaan kaga mudan yihiin Gaalnimada (kuwii
hore) (sababta ay kuwaan kaga mudan yihiin
Gaalnimada kuwii hore waxay tahay) cudur
,daar'laanta

وأنهم كفار مرتدون.

ayna yihiin kuwaan Gaalo Murtadiin ah (kuwo Diinka
.ka noqday)

الدليل الثالث: قوله تبارك تعالى:

Daliilka sedexaad: waa Qawlkii Allaah barako

:badnaayee koreeyee

لا يتخذ المؤمنون الكافرين أولياء من دون المؤمنين

Mu'miniinta yaysan ka yeelanin Gaalada Gacalo }
(Saaxiibo) Mu'miniinta sukadooda

ومن يفعل ذلك

qofkii sameeya arinkaasi (waxa laga reebaayo)

فليس من الله في شيء

Allaah xagiisa waxba uma jiraan (wuxuu gooyay
qofkaasi Xiriirkii u dhexeeyey Allaah iyo Asiga)

إلا أن تتقوا منهم تقاة

.{inaad iska ilaalisaan mooyaanee Gaalada iska ilaalin

فنهى سبحانه المؤمنين عن اتخاذ الكافرين أولياء
وأصدقاء وأصحاباً

Allaah hufnaayee wuxuu ka reebay (u diiday)

Mu'miniinta in laga yeeshto Gaalada Gacalo iyo

Saaxiibo iyo Asxaabo

من دون المؤمنين وإن كانوا خائفين منهم،

Mu'miniinta sukadooda haba aahaadaan Mu'miniinta

,kuwo ka cabsanaaya gaalada (Cabsi xitaa ha jirto)

وأخبر أن من يفعل ذلك فليس من الله في شيء،

wuxuuna sheegay Allaah qofkii sameeya arinkaasi (in
gaalada gacalo laga dhigto) inaysan Allaah xagiisa

,waxba u jirin

أي لا يكون من أولياء الله الموعودين بالنجاة في
الآخرة،

yacnii kama mid ahaanaayo Awliiyada Allaah ee loo

,yaboohay (loo balan qaaday) Bad baadada Aakhiro

إلا أن تتقوا منهم تقاة،

ilaa inaad ka dhoorsoonaataan mooyaanee gaalada

,dhoorsoonaan

وهو أن يكون الإنسان مقهوراً معهم

Tuqaatkana wuxuu yahay in uu Qofka yahay mid ay

muquuniyeen (ay qasbeen/ ay dirqiyeen) Gaalada

لا يقدر على عداوتهم،

,oo aanan awoodin la colaytankooda

فيظهر لهم المعاشرة

qofkaasi wuxuu u muujinayaa gaalada macaamilo
wanaag

والقلب مطمئنٌ بالبغضاء والعداوة،

iyadoo uu qalbiga yahay mid ay ku xasilan tahay (ugu
,jirto) Caro iyo Colaytanba

فكيف بمن اتخذهم أولياء من دون المؤمنين من غير
عذر،

waa sidee xaalka qof ka yeeshtay gaalada Gacalo
,(saaxiibo) Mu'miniinta sukadooda Cudur daar la'aan

استحباب الحياة الدنيا على الآخرة،

Jeclaanta ay (sidaasina ay u sameenayaan oo keliya)
,Nolosha Aduunyada ay ka jecel yihiin mida Aakhiro

والخوف من المشركين،

,iyo Cabsi ay ka cabsanayaan Mushrikiinta

وعدم الخوف من الله،

,iyo Alle ka cabsigii oo aan jirin

فما جعل الله الخوف منهم عذراً،

,Allaahna kama dhigin Gaalo ka cabsiga cudur daar

بل قال تعالى: {إنما لكم الشيطان يخوف أولياءه

bal wuxuu yiri Allaah {kiinaasi (Cabsi beenaadka
Gaalada) waa uun Shaydaan oo idinku cabsi gelinaayo
Awliyadiisa (Gaalada)

فلا تخافوهم وخافون إن كنتم مؤمنين. }

ee ha ka cabsoonina Aniga uun iga cabsada hadii aad
. {tihin Mu'miniin

الدليل الرابع: قوله تعالى:

:Daliilka afaraad waa Qawlkii Allaah koreeyee

{يا أيها الذين آمنوا إن تطيعوا الذين كفروا

Kuwa (Xaqa) rumeeyoow hadaad adeecdaan (u }
dhega nuglaataan) kuwa gaaloobay

يردوكم على أعقابكم

waxay idinku celinaayaan Ciribyaalkiina (Gaalnimo
ayay idin jiidayaan)

فتنقلبوا خاسرين

}.

markaasna aad gadoontaan (aad noqotaan) kuwo
.khasaaray (oo waad khasaareesan markaasi)

فأخبر تعالى أن المؤمنين إن أطاعوا الكفار
Wuxuu sheegay Allaah koreeyee in Mu'miniinta hadii
ay adeecaan (u dhega nuglaadaan) Gaalada

فلا بد أن يردوهم على أعقابهم عن الإسلام،
ay qasab tahay in ay u celinaayaan Raadadkoodii
,(Gaalnimo) kana celinaayaan Islaamka

فإنهم لا يقنعون منهم بدون الكفر،
sababtoo ah Gaalada kagama qancaayaan Mu'miniinta
,wax ka sukeeyo Gaalnimo (Gaalnimo waxaan ahayn)

وأخبر أنهم إن فعلوا ذلك
wuxuuna Allaah sheegay in hadii ay Mu'miniinta
sameeyaan arinkaasi (Adeecida gaalada iwm)

صاروا من الخاسرين في الدنيا والآخرة،
ay ka mid noqonaayaan kuwa ku khasaaray Aduunka
,iyo Aakhiraba

ولم يرخص في موافقتهم وطاعتهم خوفاً منهم،
mana ogolaanin Allaah in gaalada la waafaqo iyo
,Adeecidoodaba Cabsi ayaga laga qabo darteeda

وهذا هو الواقع،
waana sidaan waxa dhacaayo (waa sida ay wax u
,jiraan)

فإنهم لا يقنعون ممن وافقهم
sababtoo ah Gaalada kagama qancaayaan cidii ayaga
waafaqda

إلا بشهادة أنهم على حق،
ilaa uu qiro (marqaati kaco) inay ayaga (Gaalada) xaq
,ku sugan yihiin (Garta inay gaalada leeyihiin)

وإظهار العداوة والبغضاء للمسلمين،
muujistana cadaawada iyo carada uu u qabo
,Muslimiinta

وقطع اليد منهم،
,gooyana Kaalmada Muslimiinta

ثم قال { بل الله مولاكم وهو خير الناصرين }
wuxuuna yiri Allaah: { Bal Allaah ayaa ah Mawlihiina
(Gar gaarihiina) Allaahna waa Midka ugu wanaagsan
inta gar gaarta (Gar gaarid cid Allaah ku dhan ma
,jirto}

فأخبر تعالى أن الله مولى المؤمنين وناصرهم،
Allaah koreeyee wuxuu sheegay in Allaah uu yahay
,Mawlaha Mu'miniinta iyo Gar gaarahoodaba

وهو خير الناصرين ،
uuna yahay Midka ugu wanaagsan inta wax gar
,gaarta

ففي ولايته وطاعته
wilaayada Allaah iyo Adeecidiisa waxaa ku sugan
غُنية وكفاية عن طاعة الكفار،
,Deeqtoonni iyo ka kaaftoomid Daadaca Gaalada

فيا حسرة على العباد
Qoomamo waxay ku dul habsatay oo dushooda
ahaatay Adoomada waa

الذين عرفوا التوحيد ونشأوا فيه،
,kuwa gartay Tawxiidka kuna bar baaray
ودانوا به زماناً،

,in mudo ahna ka Diin dhiganaayay
كيف خرجوا عن ولاية رب العالمين، وخير الناصرين،
sidee bay uga baxeen Wilaayada Rabiga
Caalimiintiinta, Inta wax gar gaartana Midka ugu
,khayrka badan

إلى ولاية القباب وأهلها،
ayana u galeen (u tageen) wilaayada Qubadaha
(dhismooyinka qabuuraha lagu dul dhiso) iyo
,ehelkeeda

ورضوا بها
kana raali noqdeen (Qubbadaha iyo Ahalkooda)
بدلاً عن ولاية من بيده ملكوت كل شيء؟!
ayagoo ka bedel qaateen Wilaayada Cida ay
!?Gacantiisa ku jiraan wax kasta (Allaah)

بئس للظالمين بدلاً

Waxaa xumaaday waxa ay Daalimiinta bedelka u
.qaateen

الدليل الخامس: قوله تعالى:

:Daliilka shanaad waa: Qawlkaa Allaah koreeyee

{أفمن اتبع رضوان الله

Qof raacay Raali ahaanshiyaha Allaah ma la mid baa }

كمن باء بسخط من الله

**qof la soo laabtay (la soo noqday) Caro xag Allaah ka
ahaatay (ma sinno oo isku mid ma ahan meelna ma
wada galaan)**

ومأواه جهنم وبئس المصير

}

**hooygiisana (midkaan dambe meesha u dambeen
doonto) waa Jahannama meel loo noqdana u
.xumaatay**

فأخبر تعالى أنه لا يستوي

Allaah koreeyee wuxuu sheegay inaysan sinnayn

من اتبع رضوان الله،

,qof raacay Raali ahaan shiyaha Allaah

ومن اتبع ما يسخطه،

,iyo qof raacay wixii caro gelinaayo Allaah

ومأواه جهنم يوم القيامة.

.Hooygiisa ay Jahannamo tahay Maalinta Qiyaamaha

ولا ريب أن عبادة الرحمن وحده ونصرها،

**Shaki kuma jirto in Caabuditaanka Allaaha Raxmaanka
, ah keligiisa la caabudo iyo u gar gaarideeda**

وكون الإنسان من أهلها، من رضوان الله،

**iyo ka mid ahaanshiyaha dadkeeda, inay tahay Raali
,ahaanshiyaha Allaah (shaki kuma jiro)**

وأن عبادة القباب والأموات

Caabudida Qubadaha iyo (waxaan kaloo shaki ku jirin)

**Kuwa dhintay (Awliyada ama Culimo waxay ku
sheegaan ba)**

ونصرها والكون من أهلها مما يسخط الله،

iyo u gar gaarideeda iyo ka mid noqoshada Ahalkeeda
,ay tahay waxa caro gelinaayo Allaah

فلا يستوي عند الله من نصر توحيده

kama sinno (isku mid kama ahan) Allaah agtiisa Cid u
gar gaartay (garab istaagtay) Tawxiidkiisa (keliyeenta
Rabi oo Cibaadadiisa loo keliyeeyo)

ودعوته بالإخلاص وكان مع المؤمنين،

iyo Allaah xagiisa (oo Dadka) loogu yeero si ikhlaas
leh (si Dar Allaah oo aan dan Aduunyo ku jirin),
,Mu'miniintana la jiray

ومن نصر الشرك

iyo qof u gar gaaray (garab istaagay) Shirkiga

ودعوة الأموات وكان مع المشركين.

iyo Baryada Dadka dhintay Mushrikiintana la jiray
,(Allaah agtiisa kama simna labadaasi qofood)

فإن قالوا: خفنا.

hadii ay dhahaan: waan cabsanay (oo cabsi ayaa inoo
,gaysay hawshaan)

قيل لهم: كذبتهم.

.waxaa lagu dhahayaa: been baad sheegteen

وأيضا فما جعل الله الخوف عذراً

Mar kale Allaah kama yeelin Cabsida Cudur daar
loogu mar marsiyoodo

في اتباع ما يسخطه،

,in la raaco wixii Allaah caro gelinaayo

واجتناب ما يرضيه.

.loogana fogaanaayo Raali ahaan shiyahiisa

وكثير من أهل الباطل

In badan oo ka mid ah Baadilka Dadkiisa

إنما يتركون الحق

wax kale ugama tagaan Xaqa (raacistiisa)

خوفاً من زوال دنياهم.

Cabsi ay ka cabsanaayaan inay ka baa ba'do
.Aduunyadooda maahanee

وإلا

Hadii arinku intaasi ahayn (Aduuno aan loo baqeenin)

فيعرفون الحق ويعتقدونه،

way garanaayaan Xaqa wayna rumeesan yihiin (in ,waxaan xaq yihiin)

ولم يكونوا بذلك مسلمين

kumana noqonin arinkaasi (inay Xaqa xaq ahaan u .gartaan oo keliya) Muslimiin

الدليل السادس: قوله تعالى:

:Daliilka lexaad waa: Qawlkaa Allaah koreeyee

{إن الذين توفاهم الملائكة ظالمي أنفسهم

kuwa ay Malaa'igta oofsanayso (nafta ka qaadeeso) } ayagoo dulmiyay Nafsadooda

قالوا فيم كنتم

waxay (Malaa'igta) dhahaysaa maxaad ku dhex jirteen (kooxdee ku dhex jirteen Muslimiinta iyo Gaalada)

قالوا كنا مستضعفين في الأرض

waxayna dhahaayaan waxaynu ahayn kuwo lagu ,daciifsaday (ku tabar yar) Dhulka

قالوا ألم تكن أرض الله واسعة

waxay dhahaayaan miyaysan ahaanin (Malaa'igtii) Arlada Allaah mid balaaran

فتهاجروا فيها

,oo aad ku haajirtaan dhexdeeda

فأولئك مأواهم جهنم

kuwaasi Hooygooda waa Jahannamo

وساءت مصيرا {النساء آية: 97}

.{meel loo noqdana way u xumaatay

أي في أي فريق كنتم؟

?Yacnii kooxdee ayaad ku dhex jirteen

أفي فريق المسلمين،

,Ma kooxda Muslimiinta

أم في فريق المشركين؟

?mise kooxda Mushrikiinta

فاعتذروا عن كونهم ليسوا في فريق المسلمين بالاستضعاف،

Waxayse ka ga cudur daaranaayaan inaysan ka mid
,ahayn kooxda Muslimiinta tabar yari (Taag dari)

فلم تعذرهم الملائكة، وقالوا لهم:

Malaa'igtase uguma cudur daarin, waxayna ku
:dheheen

ألم تكن أرض الله واسعة فتهاجروا فيها

miyaysan ahaanin Arlada Allaah mid balaaran oo aad }
,ku haajirtaan dhexdeeda

فأولئك مأواهم جهنم وساءت مصيراً.

kuwaasi Hooygooda waa Jahannamo meel loo
. {noqdana way u xumaatay

ولا يشك عاقل

Ka shakin maayo Qof Caaqil ah (qof wax garta)

أن أهل البلدان الذين خرجوا عن المسلمين

In Dadkii Magaalooyinka deganaa ee ka baxay

Muslimiinta (safka Muslimiinta faarujiyay)

صاروا مع المشركين، وفي فريقهم وجماعتهم.

inay noqdeen (ku biireen) Mushrikiinta safkooda iyo
.kooxdooda iyo kulankooda

هذا مع أن الآية نزلت في أناس من أهل مكة

iyadoo weliba sidaasi ay tahay Aayadu waxay ku soo
degday Dad Reer Makka ka mid ah

أسلموا واحتبسوا عن الهجرة،

oo islaamay waxayse ka joogsadeen (ka baaqsadeen)
.Hijradii (Makka laga hijroonayay)

فلما خرج المشركون إلى بدر

Markii ay Mushrikiinta u soo baxeen Badar

أكرهوهم على الخروج معهم،

ayay waxay ku soo qasbeen (ku soo dirqiyeen kuwii
Muslimiinta ahaa) inay la soo baxaan (Dagaalka la soo
,galaan/u soo raacaan)

فخرجوا خائفين،

wayna soo baxeen (Muslimiintii) ayagoo

,cabsanaayaan (Gaalada ka cabsanaayaan)

فقتلهم المسلمون يوم بدر،

Muslimiinta ayaana laayay (kuwii la soo qasbay)
,Maalintii Beder

فلما علموا بقتلهم تأسفوا

markay ogaadeena inay dileen (Muslimiinta)
(Muslimiin kale, waa kuwii la soo qasbayee) ayay ka
,xumaadeen

وقالوا: قتلنا إخواننا،

waxayna dhaheen: waxaynu dilnay walaaleheena
,(Muslimiintii kale ayay ula jeedeen)

فأنزل الله فيهم هذه الآية.

Allaah ayaase ku soo dejiyay kuwii la laayay
.arinkooda Aayadaan

فكيف بأهل البلدان الذين كانوا على الإسلام

Waa sidee (ka waran xaalka iyo xukunka) Dadkii
magaalooyinka deganaa ee Islaamka ku dul sugnaa

فخلعوا ربقته من أعناقهم،

ee ka siibay (waxay ka siibeen/ ka bixiyeen) Mareegtii
,Islaamka qoortooda

وأظهروا لأهل الشرك الموافقة على دينهم،

una muujiyay (waxay u muujiyeen) Mushrikiinta inay
,ku waafaqsan yihiin Diintooda (Baadilka ah)

ودخلوا في طاعتهم،

una galay (waxay u galeen) Maamulka gaalada
(maamulkii gaalada ayay hoos yimaadeen Talada iyo
,Amarkaba ka sugeen)

وآوؤهم ونصروهم،

soona dumay (waxay soo dumeen) gaalada (oo
guryadooda ayay ku qariyeen gaaladii oo gabaad uga
,dhigeen) una gar gaaray Gaaladii

وخذلوا أهل التوحيد،

waxayna hoojiyeen (oo ay garabkooda ka baxeen)
,Ahlu Tawxiidka (Tawxiidka Dadkiisa)

واتبعوا غير سبيلهم،

waxayna raaceen wadada Ahlu Tawxiidka wado aanan
,ahayn (wadadii Gaalnimada ayay raaceen)

وخطؤوهم،

Muslimiinta ayayna Gaf iyo khalad ku xukumeen (sida inay dhahaan waa nabad diid waa ar ga gaxiso waa ,waalan yihiin iwm)

وظهر فيهم سبهم وشتهم وعيهم،

waxaana ka dhex muuqday (oo ay qar san waayeen) inay Muslimiinta caayaan iyo dhaleeceentooda iyo ,ceebeentooda (ay muslimiinta ceebeenaayaan)

والاستهزاء بهم،

,iyo in lagu jees jeeso Muslimiinta

وتسفيه رأيهم

iyo in xumaan lagu sheego Ra'yiga Muslimiinta (sababta ay ra'yi xumaanta ugu tilaamaayaana ay tahay)

في ثباتهم على التوحيد،

,ku sugnaanshiyaha ay ku sugnaadeen Tawxiidka

والصبر عليه،

,iyo ku sabrida ay ku sabreen Tawxiidka dushiisa

وعلى الجهاد فيه،

iyo inay ku jihaadaan Tawxiidka dartiidsa (arimahaani ,dartooda ayay xumaan ugu tilaameen Muslimiinta)

وعاونوهم على أهل التوحيد

waxayna ku kaalmeeyeen Gaaladii duulaanka ku ahayd Ahlu Tawxiidka (Muslimiinta)

طوعاً لا كرهاً،

,ayagoo doortay oo aan la qasbin

واختياراً لا اضطراراً؟

iyo doorasho ay ayaga doorteen wax dhibaato oo u gaysay ma ahayn (ka waran Dad intaan oo arin ah ?sameeyey xaalkooda iyo xukunkooda muxuu noqon)

فهؤلاء أولى بالكفر والنار

Kuwaan ayaa Gaalnimo iyo Naar kaaga mudan

من الذين تركوا الهجرة شحاً بالوطن،

kuwii ka tagey Hijrada (waa Muslimiintii Makka ku hartay xiligii Hijrada) wadan ku baxhiilid darteeda ,(wadan jaceel dartiisa)

وخوفاً من الكفار،

,iyo cabsi ay gaalada ka cabsanaayeen

وخرجوا في جيشهم مكرهين خائفين.

waxayna ku dhex baxeen (ay raaceen) Ciidankii
.gaalada ayagoo la qasbay oo cabsanaayaan

فإن قال قائل:

:Hadii uu Qof yiraahdo

هَلَّا كَانَ الْإِكْرَاهُ عَلَى الْخُرُوجِ عَذْرًا لِلَّذِينَ قَتَلُوا يَوْمَ بَدْرٍ؟

miyaynan u ahayn Qasbidii Bixitaanka lagu qasbay
?Cudur daar kuwii la dilay maalintii Badar

قيل لا يكون عذراً،

,Waxaa la leeyahay: Cudur daar ma ahaanaayo

لأنهم في أول الأمر لم يكونوا معذورين

sababtoo ah markii horeba (intaan duulaanka loo soo
qasbin ka hor) ma aheen kuwo cudur daar u haysta

إذا قاموا مع الكفار،

markii ay gaalada la joogeen (la nagaayeen, gaalo la
,joogiidii horeba cudur daar uma haysanin)

فلا يعذرون بعد ذلك بالإكراه،

loogumana cudur daaraayo arinkaasi ka dib Qasabka
,(la qasbay ee duulaanka lagu soo qasbay)

لأنهم السبب في ذلك

Sababtoo ah ayagaa sabab u ahaa arinkaasi (in la
,qasbo oo dagaalka loo soo kaxeesto)

حيث قاموا معهم وتركوا الهجرة

.markii ay la joogeen gaalada ayna ka tageen Hijrada

الدليل السابع: قوله تعالى:

:Daliilka todobaad waa :Qawlkaa Allaah koreeyee

{وقد نزل عليكم في الكتاب

wuxuu (Allaah) ku soo dejiyay korkiina Kitaabka }
dhexdiisa

أن إذا سمعتم آيات الله يكفر بها ويستهزأ بها

hadaad maqashaan Aayaatka Allaah oo lagu
gaaloobaayo, laguna jees jeesaayo

فلا تقعدوا معهم حتى يخوضوا في حديث غيره

ha fadhiisanina agtooda (kuwa ku kufrinaya Aayaatka)
,intay ka dhumbadaan warkaasi war aan ahayn

إنكم إذا مثلهم

}

hadii kale (hadii aad sii ag fadhisaan oo aydaan ka kicina meeshaasi ama aadan ka dhii-dhinina) Ayaga .{ayaad la mid tihiin (oo Gaalo ayaad tihiin)

فذكر الله تعالى أنه نزل على المؤمنين في الكتاب

Allaah koreeyee wuxuu sheegay inuu ku soo dul dejiyay Mu'miniinta Kitaabka dhexdiisa

أنهم إذا سمعوا آيات الله يكفر بها،

in hadii ay maqlaan iyadoo Aayaatka Allaah lagu ,kufrinaayo

ويستهزأ بها،

,laguna jees jeesaayo

فلا يقعدوا معهم

inaysan la sii fadhinin (kuwii ku kufrinaayay, kuna jees jeesaayay Aayaatka Rabi)

حتى يخوضوا في حديث غيره.

ilaa ay ka dhumbadaan (diirada saaraan) warkaasi war .aan ahayn

وأن من جلس مع الكافرين بآيات الله،

Qofkii la fadhiista kuwa (Allaah wuxuu kaloo sheegay) ,ku gaaloobaya Aayaatka Allaah

المستهزئين بها في حال كفرهم واستهزائهم،

eena ku jees jeesaayo Aayaatka (qofkii la sii fadhiya) marka ay sameenaayaan Gaalnimadooda iyo Jeas ,jeesidooda (ay Diinka Allaah ku jees jeesayaan)

فهو مثلهم.

inuu qofkaasi (meeshaasi sii fadhiya) ayaga la mid .yahay (ayuu Allaah cadeeyey oo uu sheegay)

ولم يفرق بين الخائف وغيره إلا المكره،

Rabi uma kala saarin Qof cabsanaayo iyo Qof kaleba Qof la dir qiyay mooyaanee (qofka la dirqiyay arinkiisa meelo kale ayaa lagu sheegay ee aayadaani laguma ,sheegin)

هذا وهم في بلد واحد في أول الإسلام،

kani (warkaasi wuxuu dhacay) ayagoo isla jooga hal
,Magaalo Islaamka horaantiisa

كفیف بمن كان في سعة الإسلام وعزة بلاده،

waa sidee (ka waran xaalka) qof ku sugan (oo ku dhex
,jira) Balaarnida Islaamka iyo Cizada Baladkiisa

فدعا الكافرين بآيات الله المستهزئين بها إلى بلاده،

una yeertay kuwa ku gaaloobay Aayaatka Allaah ee ku
jees jeesa Aayaatka uguna yeeray inay yimaadaan
,Baladkiisa (wadankiisa)

واتخذهم أولياء وأصحاباً وجلساء،

kana dhigtay Gacalo iyo Saaxiibo iyo kuwo lala
,fadhiisto

وسمع كفرهم

oona dhagaystay (maqlayna) Gaalnimadooda

واستهزاءهم

iyo ku jees jeesidooda (ay ku jees jeesayaan Aayaatka
Rabi)

وأقرّهم

una sugay (arinkaasi oo aysan ku in kirin/ gaashaanka
u daruurin)

وطرد أهل التوحيد وأبعدهم؟

iskana eryay Ahlu Tawxiidka iskana fogeeyay (qofka .
waxaan sameeyey ka waran xaalkiisa iyo
.?xukunkiisa)

الدليل الثامن: قوله تعالى:

: Daliilka sideedaad waa: Qawlkaa Allaah koreeyee

{يا أيها الذين آمنوا لا تتخذوا اليهود والنصارى أولياء

kuwa (Xaqa) rumeeyoow ha ka yeelanina (ha ka }

dhiganina) Yahuuda iyo Nasaarada Gacalo

(sukeeyayaal iyo saaxiibo)

بعضهم أولياء بعض

**Qaarkood waa Sukeeyaha Qaarka kale (Ayagaa gacalo
,isku ah oo isaga kaa dhaw, xulafo isku ah)**

ومن يتولهم منكم فإنه منهم

Cidii ka sukeeyo dhigata (Yahuuda iyo Nasaarada iwm) oo Adinka idin ka mid ah wuxuu ka mid yahay iyaga (safkooda ayuu maray oo waa Gaal)

إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ } المائدة (آية: 51)

Allaah ma hanuuniyo Qawmka daalimiinta ah} Al-

.Maa'idah: aayada 56aad

فَنَهَىٰ سُبْحَانَهُ الْمُؤْمِنِينَ عَنِ اتِّخَاذِ الْيَهُودِ وَالنَّصَارَىٰ
أَوْلِيَاءَ،

Wuxuu Allaah Hufnaayee ka reebay Mu'miniinta inay ka yeeshtaan (ka dhigtaan) Yahuuda iyo Nasaarada ,Gacalo (sukeeyayaal iyo saaxiiboyaal)

وَأَخْبَرَ أَنَّ مِنْ تَوَلَّاهُمْ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ فَهُوَ مِنْهُمْ.

wuxuuna sheegay (Allaah) in qofkii Gacalo (Sukeeyo) ka dhigta Gaalada oo Mu'miniinta ka mid ah inuu .Gaalada ka mid yahay (waa Qof gaaloobay)

وَهَكَذَا حَكَمَ مَنْ تَوَلَّى الْكُفَّارَ مِنَ الْمَجُوسِ

Waana Sidaas oo kale Xukunka Qofkii ka weli yeesha Gaalada Mujuusta ah

وَعِبَادَ الْأَوْثَانِ فَهُوَ مِنْهُمْ،

iyo Kuwa caabuda Asnaamta Iyagoo la mid yahay (oo ,waa majuusi, mushrik=gaal)

فَإِنْ جَادَلَ مُجَادِلٌ

hadii uu ku doodo Doodaay (hadii uu Qof ku doodo)

فِي أَنْ عِبَادَةَ الْقُبَابِ

in Qubadaha Cibaadadooda

وَدَعَاءِ الْأَمْوَآتِ مَعَ اللَّهِ لَيْسَ بِشِرْكٍ،

iyo Kuwa dhintay oo la baryo Allaah la jirinkiisa Shirki maahan

وَأَنَّ أَهْلَهَا لَيْسُوا بِمُشْرِكِينَ،

iyo kuwa sidaasi sameenaaya (arinka shirkiga)

,Mushrikiin maahan (qofkii sidaasi ku doodaayo)

بِأَنَّهُ أَمْرُهُ

,Qofkaasi arinkiisa wuu cadaaday

وَإِتَّضَحَ عُنَادُهُ وَكُفْرُهُ.

waxaa kaloo cadaaday qofkaasi madax adeegiisa iyo .gaalnimadiisa

ولم يفرق تبارك وتعالى بين الخائف وغيره،
Makala saarin (ma kala soocin) Allaah barako
,badnaayee koreeyeena Mid cabsaday iyo Mid kaleba
بل أخبر تعالى

bal wuxuu sheegay Alle kor ahaayee
أن الذين في قلوبهم مرض
in kuwa ay quluubtooda ku jirto Jiro
يفعلون ذلك خوفاً من الدوائر.
ay u sameeyaan arinkaasi (Gaalo u dhawaan shiyaha)
.Cabsi ay ka qabaan Masaa'ibta

وهكذا حال هؤلاء المرتدين،
Waana Sidaasoo kale Xaalka Kuwa Diinta ka noqday
,(ee gaaloobay)

خافوا من الدوائر،
,ee ka cabsaday inay ku dhacdo Musiibooyin

وزال ما في قلوبهم من الإيمان
waxaana baa ba'ay (tir tirmay) wixii Quluubtooda ku
jirtay ee ahaa rumeentii ay rumeesnaayeen
بوعده الله الصادق بالنصر لأهل التوحيد،

Balankii Allaah ee runta ahaa ee ahaa inuu u gar
gaaraayo Tawxiidka Dadkiisa (markii ay rajadaasi ka
,zuushay ayay)
فبادروا وسارعوا إلى أهل الشرك،

waxay u deg degeen una dhaqsadeen inay aadaan
,dhinaca Ahlu Shirkiga
خوفاً أن تصيبهم دائرة.

.cabsi ay ka qabaan inay ku dhacdo Musiibo
قال الله تعالى: {فعسى الله أن يأتي بالفتح
Allaah koreeyee wuxuu yiri: { Allaah wuxuu mudan
yahay inuu keeno (la yimaado) Fatxi (Gargaar)
أو أمر من عنده

ama Arin xagiisa ka yimaada
فيصبحوا على ما أسروا في أنفسهم نادمين
}.

oo ay waaberiistaan (oo ay noqdaan) Kuwo wixii ay
. {qarsanaayeen ka qoomameeya (ka shalaaya)

الدليل التاسع: قوله تعالى:

:Daliilka sagaalaad waa: Qawlka Allaah koreeyee

{ترى كثيراً منهم يتولون الذين كفروا

**waxaad arkaysaa (Nebi Muxammedow) in badan oo }
ka mid ah (kuwa Islaamka sheegtay) oo ka sukeeyo
dhiganaayo kuwii gaaloobay**

لبئس ما قدمت لهم أنفسهم أن سخط الله عليهم

**waxaa baas leh (xun) waxay u hor marisay Naftooda
oo ah in Carada Allaah ay dushooda ahaatay**

وفي العذاب هم خالدون} المائدة (آية: 80)

.{Cadaabka dhex diisana waa kuwa ku waaraya

فذكر الله تعالى أن موالة الكفار موجبة لسخط الله،

**Wuxuu sheegay Allaah koreeyee in Gaalada oo laga
sukeeyo dhigto ay ka waajibayso (ay ka dhalanayso)
,Carada Allaah**

والخلود في العذاب بمجردھا،

**iyo Naartoo lagu waaro ka sukeeyo dhigashadaasi oo
,keliya ayay ka dhalanaysaa**

وإن كان الإنسان خائفاً،

,haba ahaado qofka mid cabsanaayo

إلا من أكره بشرطه،

**aan ka ahayn Qof la qasbay shuruudiisana ay u dhan
,tahay (qasabkaasi)**

فكيف إذا اجتمع ذلك مع الكفر الصريح،

**waa sidee (ka waran) hadii uu ku darsaday arinkaasi
,(gaalo ka sukeeyo dhigashada) Gaalnimo cad**

وهو معادة التوحيد وأهله،

**Gaalnimada cad (ee uu ku sugan yahay waa)in lala
,coloobo Tawxiidka iyo Dadkiisa**

والمعاونة على زوال دعوة الله بالاخلاص،

**iyo in lagu kaalmeeyo (kaalmo laga gaysto) siday ku
,zuuli lahayd Allaah oo Dadka loogu yeero ikhlaaska**

وعلى تثبيت دعوة غيره؟!

iyo siday ku sugnaan lahayd Allaah cid aan ahayn oo
Dadka loogu yeero (Shirki) (ka waran qofka sidaan uu
?!yahay xaalkiisa xukunka uu yeelanaayo

الدليل العاشر: قوله تعالى:

:Daliilka tobonaad waa: Qawlka Allaah koreeyee

{ولو كانوا يؤمنون بالله والنبي وما أنزل إليه

hadii ay ahaan lahaayeen Kuwo rumeesan Allaah iyo }

Nebiga iyo wixii loo soo dejiyay Nebiga

ما اتخذوهم أولياء ولكن كثيراً منهم فاسقون

}

**kama dhigteen sukeeyayaal (Gacalo) Gaalada balse in
badan oo ka mid ah (Kuwa Islaamka sheegtay) waa**

.{Faasiqiin

فذكر تعالى أن موالاة الكفار منافية

Wuxuu sheegay Allaah koreeyee in Gacalnimada

Gaalada ay diidayso

**للإيمان بالله والنبي صلى الله عليه وسلم وما أنزل
إليه.**

Rumaynta Allaah iyo Nebiga scw iyo wixii lagu soo

.dejiyay Nebiga scw

ثم أخبر أن سبب ذلك كون كثير منهم فاسقين،

Ka dibna wuxuu sheegay Allaah sababta arintaasi

(Gaalada in gacal laga dhigto) inay tahay inay

,badankooda hore u ahaayeen Faasiqiin

ولم يفرق بين من خاف الدائرة وبين من لم يخف،

Allaah ma kala saarin (ma kala qaadin) qofka ka

,cabsada Dhibaatooyinka iyo qofkaan ka cabsanin

وهكذا حال كثير من هؤلاء المرتدين

waana sidaasi xaalka in badan oo ka mid ah

Murtadiintaasi (Kuwa Diinka ka ridoobay (ka noqday)

قبل ردتهم كثير منهم فاسقون،

Ridoobidooda ka hor (Diin ka noqoshadooda ka hor)

in badan oo kuwaasi ka mid ah waxay ahaayeen

,Faasiqiin (kuwo daacada Allaah ka furtay)

فجرهم ذلك إلى موالاة الكفار،

arinkaasi ayaa ku jiiday (ku riixay) ka sukeeyo

,dhigashada Gaalada (inay Gaalo Gacal ka dhigtaan)

والردة عن الإسلام، نعوذ بالله من ذلك
iyo ka noqoshada Islaamka, Allaah ayaan ka magan .
.galeenaa arinkaasi (ka noqoshada Islaam)

الدليل الحادي عشر: قوله تعالى:
:Daliilka kow iyo tobonaad: Qawlkii Allaah koreeyee

{وإن الشياطين ليوحون إلى أوليائهم
Shaydaamaduna (waa shayaadiinul Insiga) wax bay u}
waxyoodaan(u sheegaan) Saaxiibadooda
ليجادلوكم

si ay idinkula doodaan (idinkula murmaan)
{وإن أطمعموهم إنكم لمشركون} الانعام (آية: 121)
hadaad ka yeeshaan (waxay wataan) waxaad tihiin
{Mushrikiin (Gaaloo)}
وهذه الآية نزلت لما قال المشركون:
Aayadaan waxay soo degtay markay dheheen
:Mushrikiintii

تأكلون ما قتلتم ولا تأكلون ما قتل الله،
waxaad cuntaan (Muslimiina) waxaad disheen mana
cuntaan wuxuu Allaah dilay (Neefka iska dhintay ee
,aan la gawricin)
فأنزل الله هذه الآية.

.markaas ayuu Allaah soo dejiyay Aayadaan
فإذا كان من أطاع المشركين في تحليل الميتة مشركاً
Hadii Qofkii Mushrikiinta ku adeeca xalaal ka dhigida
waxa bakhtiyay uu noqonaayo Mushrik
من غير فرق بين الخائف وغيره إلا المكره،
iyadoo aan loo kala saarin Qof cabsada iyo qof kale
,marka laga reebo Qofka la dirqiyay (la qasbay)
فكيف بمن أطاعهم في تحليل مواليتهم،

waa side (xukunka) qofka ku adeeca gaalada xalaal ka
,dhigida (inay banaantahay) Gacaltooyada Gaalada
والكون معهم ونصرهم،
iyo in laga mid noqdo (lala jiro) Gaalada iyo in loo gar
,gaaro Gaalada

والشهادة أنهم على حق،

,iyo in la qiro inay gaalada ku dul sugan yihiin Xaq
واستحلال دماء المسلمين وأموالهم،
 ,iyo in la baneeysto Dhiiga Muslimiinta iyo Maalkooda
والخروج عن جماعة المسلمين
 iyo in laga baxo (laga tago) Kulanka Muslimiinta
إلى جماعة المشركين؟
 loona baxo (loo tago) Kulanka Mushrikiinta (qofka
 ?sidaan ah xukunkiisa waa sidee , ka waran)
فهؤلاء أولى بالكفر والشرك
 Kuwaani (kuwa inta la soo sheegay sameeyey) ayaa
 ka mudan (kaga dhow) Gaalnimada iyo Shirkiga
ممن وافقهم على أن المية حلال
 qofka ku waafaqa gaalada in uu Bakhtiga Banaan .
 .yahay (kuwa hore ayaa gaalnimada sii mudan)

الدليل الثاني عشر: قوله تعالى:
:Daliilka labo iyo tobonaad: Qawlkaa Allaah koreeyee
{واتل عليهم نبأ الذي آتيناه آياتنا فانسلخ منها}
kuna dul aqri korkooda kii warkiisii aan siinay }
,Aayaatkeena ee ka siibtay Aayaatka
فأتبعه الشيطان فكان من الغاوين {الاعراف (آية: 175)}
Waxaa raacay Shaydaanka wuxuuna ka mid noqday
.{kuwa Baadida ah}
وهذه الآية نزلت في عالم عابد في زمان بني إسرائيل،
 Aayadaan waxay ku soo degtay Nin Caalim ahaa
 ,Cibaado badnaa xiligii Reer Banii Israa'iil ay joogeen

يقال له: بلعام، وكان يعلم الاسم الأعظم.
 oo la dhihi jiray Bilcaam, wuxuu yaqaanay Magaca
 Allaah ee wayn (oo Rabi markii lagu baryo ducada
 .aqbalo

قال ابن أبي طلحة عن ابن عباس:
 Wuxuu yiri Ibnu Abii Dalxah Asigoo ka werinaayo Ibnu
 :Cabaas
(لما نزل بهم موسى عليه السلام - يعني بالجبارين -

markuu ku dul degay Nebi Muuse cs Jabbaariinta)
(qolyihii carbeen ee gaalada ahaa ee la dhihi jiray
Camaaliqa oo deganaa Shaam)

أتاه بنو عمه وقومه فقالوا:

waxaa u yimid (u tegay) (Caalimkii Caabidka ahaa) ina
Adeeradiisa iyo Tolkiisa waxay dhaheen (oo ay
:caalimkii ku dhaheen)

إن موسى رجل حديد،

,Muuse waa nin adag oo bir ah

ومعه جنود كثيرة،

,wuxuuna wataa Ciidan fara badan

وإنه إن يظهر علينا يهلكنا،

hadii uu naga adkaadana wuu na halaagayaa (wuuna
,rogayaa)

فادع الله أن يرّدّ عنا موسى ومن معه.

ee Allaah bari (noo tuug) inuu naga celiyo Muuse iyo
.inta uu wato

قال: إني إن دعوت ذهبت دنياي وأخرتي،

Wuxuu yiri (caabidkii) hadii aan baryo (Rabi oo aan
habaaro Muuse iyo intuu wato) Aduunyadeyda iyo
,Aakhiradaydaba way tagtay (way baa ba'day)

فلم يزالوا به حتى دعا عليهم،

kama aysan suulin (inay baryaan wax walba iyo si
walbka ku dayaan) ilaa uu habaaray (Dadkii
,Muslimiinta ahaa taladii tolkiisana uu qaatay)

فسلخه الله مما كان عليه.

Allaah ayaa ka siibay wixii uu ku dul sugnaa (Cilmigii
.iyo Cibaadadiiba way is daayeen)

فذلك قوله تعالى:

:Arinkaasina waa Qawlkii Allaah koreeyee

} فانسلخ منها

,wuxuu ka siibtay Aayaatka }

فأتبعه الشيطان فكان من الغاوين } الاعراف (آية: 175)

Waxaa raacay Shaydaanka wuxuuna ka mid noqday
.kuwa Baadida ah

وقال ابن زيد: (كان هواه مع القوم) -

Ibnu Zayd wuxuu yiri: (Ninkii Caabidka ahaa hawadiisa
-waxay la socotay (la jirtay) Tolkiisa)

يعني الذين حاربوا موسى وقومه -

yacnii kuwii la dagaalamay Nebi Muuse cs iyo
-Tolkiisa

فذكر تعالى أمر هذا المنسلخ من آيات الله،

wuxuu sheegay Allaah koreeyee arinka ninkaan ka
,siibtay Aayaatka Allaah

بعد أن أعطاه الله إياها،

,ka dib markuu Allaah siiyey Ninkaasi Aayaatka

وعرفها وصار من أهلها

uuna gartay (fahmay, ogaaday) Aayaatka kana mid
,noqday Ahalka Aayaatka

ثم انسلخ منها،

ka dibna wuu ka siibtay (wuu ka dhex baxay Aayaatkii
,uu bartay ehelkana u ahaa)

أي ترك العمل بها،

,yacnii wuxuu ka tegay inuu ku camal falo Aayaatkii

وذكر في انسلخه منها ما معناه

wuxuu Allaah sheegay ka siibashada uu ninkaani ka
siibtay Diinta wax uu macnihiisu yahay (sababta uu
Diinka uga siibtay nuxurkeedu ama biyo dhaceedu)

أنه مظاهره المشركين

inuu yahay Mushrikiinta kaalmayntooda (uu ku
kaalmeeyey Ducada / habaarka)

ومعاونتهم برأيه،

iyo Mushrikiinta uu ku caawiyay Ra'yigiisa (oo wuxuu
Ra'yi ahaan u keenay in gabdho qurux badan lagu
fidneeyo Muslimiinta si ay zino iyo macaasi oo dhan
,ugu dhacaan oo Jihaadkoodii u baaqdo)

والدعاء على موسى عليه السلام ومن معه،

iyo in la habaaro Muuse cs iyo intii la socotay
,(gaaladii ayuu intaasi ku kaalmeeyey)

أن يردهم الله عن قومه،

inuu Allaah dib (wuxuu ku duceeyey waxay ahayd)
,uga celiyo Muuse iyo intuu watay ninkaan tolkiisa

خوفاً على قومه

cabsi uu u (wuxuuna sidaasi u sameeyey)
cabsanaayay Tolkiisa (inay baa ba'aan)

وشفقة عليهم،

,iyo Damqasho uu u damqanaayay Tolkiisa

مع كونه يعرف الحق،

weliba (wuxuu arinkaasi sameeyey) asigoo garanaayo
,Xaqa

ويشهد به، ويتعبد،

,uuna qiraayo Xaqa, uuna ku cibaadeesanaayo Xaqa

ولكن صدّه عن العمل به

laakiinse waxaa ka hor istaagay inuu ku camal falo
Xaqa

متابعة قومه وعشيرته

Raacidii uu raacay Tolkiisa iyo Qaraabadiisa

وهواه وإخلاده إلى الأرض،

iyo Hawadiisa (wuxuu jeclaa), iyo u jan jeersigiisii
Arlada (Aduunyo jacayl ayuu u jan jeersaday)

فكان هذا انسلاخاً من آيات الله تعالى.

arinkaan ayaana sabab u ahaa ka siibashadii Aayaatka
,Allaah

وهذا هو الواقع

waana waxa hada ka dhacaayo (oo ay sameenaayaan)

من هؤلاء المرتدين وأعظم،

Murtadiintaan (kuwaan Diinta ka ridoobay / ka noqday)
iyo weliba ka wayn (kuwii hore waxay sameeyeen wax
,ka wayn ayay sameeyaan kuwaan hada jooga)

فإن الله أعطاهم آياته التي فيها الأمر بالتوحيد،

Allaah wuxuu siiyey (kuwaan dambe) Aayaatkiisa oo
,ay ku dhex jirto is amrida Tawxiidka (Keliyeeynta)

ودعوته وحده لا شريك له،

iyo in la baryo Allaah keligiisa cid wax la wadaagtana
,aysan jirin

والنهي عن الشرك به ودعوة غيره،

iyo (Dadka) oo laga reebo in Allaah wax lala wadaajiyo
,iyo in la baryo cid aan Allaah ahayn

والأمر بموالة المؤمنين ومحبتهم ونصرتهم،

iyo in la is faro Mu'miniinta oo Sukeeyo laga dhigto ,
,lana jeclaado loona gar gaaro Mu'miniinta

والاعتصام بحبل الله جميعا، والكون مع المؤمنين،

iyo in lawada qabsado Xariga Allaah (Tawxiidka), iyo
,Mu'miniinta oo lala jiro (Safkooda laga mid noqdo)

والأمر بمعاداة المشركين،

,iyo in la is amro la colaytanka Mushrikiinta

وبغضهم وجهادهم

iyo in loo caroodo Mushrikiinta iyo in lagu jihaado
(lala dagaalamo Gaalada)

وفراقهم

,iyo in laga tago (laga hijroodo Gaalada)

والأمر بهدم الأوثان،

,iyo in la is faro Jejebinta Asnaamta

وإزالة القباب

iyo in la zuuliyo (oo lala dagaalamo) Sharmuutooyinka
(Dumarka zinaysta ee jirkooda ka gacansada)

واللواط والمنكرات،

,iyo Khaniis-nimada (oo la zuuliyo) iyo Munkaraatka

فعرفوها وأقروا بها،

(Aayaatkii Tawxiidka iyo Diinka oo dhan ka hadlaayay)
ayay garteen wayna qireen (Tawxiidkii iyo Qaybaha
,kale ee Diinta)

ثم انسلخوا من ذلك كله،

intaa ka dib way ka siibteen arinkaasi (wanaagii la soo
,sheegay) oo dhan

فهم أولى بالانسلاخ من آيات الله

Kuwaan (dambe) ayaa kaga mudan (kaga dhaw) ka
siibasho Aayaatka Allaah laga siibto

والكفر والردة

iyo Gaalnimo iyo Diin ka noqosho

من بلعام أو هم مثله

.

waxay ka mudan yihiin oo ay Gaalnimada kaga)
Bilcaam ama (marka arinka la soo (dhawyihiin
.gaabiyo) Bilcaam bay la mid yihiin (xaga Gaalnimada)

الدليل الثالث عشر: قوله تعالى:

:Daliilka sedex iyo tobonaad: Qawlkaa Allaah koreeyee

{ولا تركنوا إلى الذين ظلموا}

ha u iilanina (ha u jan jeersanina) Kuwa Dulmiga }
falay (Gaalada ama Fasaqada labadaba waa lagu
fasiray)

فتمسكم النار

,oo ay markaasi idin taabato Naarta

ومالكم من دون الله من أولياء

mana idin sugnaanin (ma lihidiin) Allaah sukadiisa
Awliyo

ثم لا تنصرون.} هود (آية: 113)

.{ka dibna la idin gar gaari maayo

**فذكر تعالى أن الركون إلى الظلمة من الكفار
والظالمين**

Allaah koreeyee wuxuu sheegay in u iilashada (u jan
jeersiga) loo jan jeersado Faasiqiinta Gaalada ah iyo
Daalimiinta (muslimiinta ka midka ah)

موجب لمسييس النار،

uu waajibinaayo taabasho Naar (Cadaab inuu ku
taabto ayaa ka dhalanayso hadaad Daalim dhinaciisa
,martid ama aad in yar af ama idin aad ku difaacdid)

ولم يفرق بين من خاف منهم وغيره إلا المكره،

mana kala saarin Allaah Cid cabsatay oo ayaga ka mid
ah iyo cid kaleba marka laga reebo Qof la qasbay
,(qofka la dirqiyay xukunkiisa waa gaar)

فكيف بمن اتخذ الركون إليهم ديناً ورأياً حسناً،

waa sidee (ka waran xukunka) qofka ka dhigtay in
,Gaaloo loo iisho Diin iyo Ra'yi wanaagsan

وأعانهم بما قدر عليه من مال ورأي،

kuna kaalmeeyey Gaalada wuxuu awoodo oo Maal iyo
,Talo ba ah (Ra'yi)

وأحبَّ زوال التوحيد وأهله،

weliba jeclaaday in uu zuulo (baaba'o) Tawxiidka iyo
,Tawxiidka Dadkiisa

واستيلاء أهل الشرك عليهم؟!

iyoo inay Ahlu- Shirkiga qabsadaan (gacanta ku dhigaan) Ahlu-Taxiidka (qofkii intaan ugu dhawaada !?Gaalada xukunkiisa muxuu noqon/ ka waran)

فإن هذا أعظم الكفر والركون

in arinkaani (uu qofka (waxaan shaki ku jirin) sameeyey) uu yahay midka ugu wayn Gaalnimada iyo .u iilashada (Gaalada)

الدليل الرابع عشر: قوله تعالى:

:Daliilka afar iyo tobonaad: Qawlkii Allaah koreeyee

{من كفر بالله من بعد إيمانه

Qofkii Allaah ku gaalooba intuu Alle rumeeyey ka dib}

إلا من أكره وقلبه مطمئن بالإيمان

qof la qasbay (la dirqiyay) mooyaanee qalbigiisana uu .,limaanku ku xasilan yahay

ولكن من شرح بالكفر صدراً

balse qofkii u waasiciya gaalnimada qalbigiisa (Cidii qalbiga gaalnimo u furta ilayn qalbiga la iskama qasbi karo)

فعليهم غضب من الله ولهم عذاب عظيم.

waxaa dushooda ahaatay Caro xag Allaah ka ahaatay waxayna leeyihiin Cadaab wayn

ذلك بأنهم استحبوا الحياة الدنيا على الآخرة

Arinkaasina (gaalnimada ay ku dhaceen) waxaa sabab u ahaa nolosha Aduunyada oo ay ka jeclaadeen mida Aakhiro

وأن الله لا يهدي القوم الكافرين

.{Allaahna ma hanuuniyo qawmka gaalada ah

فحكم تعالى حكماً لا يبذل

Allaah wuxuu xukumay Xukum aan la badeleenin

أن من رجع عن دينه إلى الكفر،

oo ah in qofkii ka noqda Diinkiisa (Islaamka) una
noqda Gaalnimo (Diin Shaydaan)

فهو كافر،

,inuu Qofkaasi yahay Gaal (ayuu Allaah xukumay)

سواء كان له عذر خوفاً على نفس أو مال أو أهل،

waxaa isku mid ah inuu qofkaasi leeyahay cudurdaar
,ah inuu u cabsanaayay Nafta ama Maalka ama Ahalka
أم لا،

ama inuusan lahayn (qofkaasi cudurdaar cabsi ah
,dabcan waa cabsi aan gaar siisnayn ikraah)

وسواء كفر بباطنه أم بظاهره دون باطنه،

waxaa kaloo isku mid ah inuu qofka ka gaaloobo
Baadinka (Qalbiga) ama muuqaalka kore inuu ka
,gaaloobo aan gudaha jirin

وسواء كفر بفعاله ومقاله،

waxaa kaloo isku mid ah inuu ku gaaloobo ficil uu
sameeyo ama hadal uu dhaho

أو بأحدهما دون الآخر،

ama midkooda aan midka kale la jirin (hadal ama ficil
,midkooda)

وسواء كان طامعاً في دنيا ينالها من المشركين أم لا،

waxaa kaloo isku mid ah inuu ku gaaloobo qofka
Damac uu Aduunyo u qabo uu ka helaayo
,Mushrikiinta ama damac la'aan

فهو كافر على كل حال إلا المكره،

waa Gaal qofkaasi si kasto oo ay arin ahaataba marka
,laga reebo Qofka la qasbay (la dirqiyay)

وهو في لغتنا: المغضوب.

Mukrahna (midka la dirqiyay) waa midka loo yaqaano
luuqadeena (ee Magalaada Najdi looga hadlo
caamadana ay isticmaasho waa): Al-maghsuubu
(qofka laga qaaday ikhtiyaarka iyo xuriyada ee la
.afduubay ayaa la dhahaa)

فإذا أكره الإنسان على الكفر وقيل له:

Insaanka (qofka Muslimka ah) hadii lagu qasbo
:gaalnimada oo lagu yiraahdo

اكفر وإلا قتلناك أو ضربناك،

gaaloow ama waan ku dilaynaa ama waan ku
,garaacaynaa

أو أخذه المشركون فضربوه،

ama intay qabtaan Mushrikiinta ay markaasi
,garaacaan

ولم يمكنه التخلص إلا بموافقتهم،

aysanna u suura gelaynin inuu ka baxsado inuu
,ogolaado maahanee (Gaalada waxay wataan)

جاز له موافقتهم في الظاهر،

waxaa u banaan qofkaasi inuu ku waafaqo gaalada
,muuqaalka kore

بشرط أن يكون قلبه مطمئناً بالإيمان،

laakiin waxaa shardi ah inuu ahaado qalbigiisa mid ku
,xasilan limaanka

أي ثابتاً عليه، معتقداً له.

yacnii uu limaanku ku sugan yahay qofka, Tawxiidka
.ictiqaadsan (Tawxiidka qalbigiisa ku guntan yahay)

فأما إن وافقهم بقلبه

Hadii uuse qofka ku waafaqo gaalada qalbigiisa

فهو كافر ولو كان مكرهاً.

waa Gaal haba ahaado mid la dirqiyey (ilayn qalbiga
,lama dirqin karee)

وظاهر كلام أحمد رحمه الله أنه في الصورة الأولى

muuqaalka kore ee hadalka Axmed Allaah ha u
naxariistee waxaa ku sugan suurada hore (yacnii
fagta hore oo ay Gaaladu qabtaan qofka Muslimka ah
ayna ku yiraahdaan gaalow ama waan ku dilaynaa
ama waan ku garaacaynaa oo ay ku kooban oo keliya
han jabaada ee aan la soconin ficil sida in la jir dilo
qofka iwm qofka sidaasi ah oo aysan gacan ula tegin)

لا يكون مكرهاً حتى يعذبه المشركون،

ma noqonaayo Mukrah ilaa ay Mushrikiinta ka
cadaabaan (ay gacan ula tagaan) qofkaas (hadalka
,Axmed muuqaalkiisa kore sidaasi ayaa ku sugan)

فإنه لما دخل عليه يحيى بن معين وهو مريض،

ilay markii uu Yaxya Ibnu Maciin u soo galay Axmed
,oo jiran

فسلم عليه فلم يرد عليه السلام،

wuxuu salaamay Axmed , Axmedse kuma (Yaxya)
,celinin (kama redinin) Salaantii

فما زال يعتذر ويقول:

Yaxye kama zuulin inuu cudur daarto uuna yiraahdo
(uu sheeganaayo qiilal badan oo ku qasbay inuu
:yiraahdo Al-Qur'aanu Makhluuq)

(حديث عمار.

Xadiithkii Cammaar (soo ma haysid, Axmed ayuu)
.xasuusinayaa)

وقال الله تعالى: {إلا من أكره وقلبه مطمئن بالإيمان}،
Allaah koreeyee na wuxuu yiri (Qof la dirqiyay
mooyaanee oo qalbigiisana ku xasilan yahay
,limaanka)

فقلب أحمد وجهه إلى الجانب الآخر،

,Axmed wuxuu wejigiisii u rogay dhinaca kale

فقال يحيى :لا يقبل عذراً)،

Yaxyana wuxuu yiri: (ma aqbalaayo (Axmed) cudur
,daar)

فلما خرج يحيى قال أحمد:

:markuu Yaxye baxay, Axmed wuxuu yiri

(يحتج بحديث عمار، وحديث عمار؛

wuxuu xujeesanaayaa (Yaxye) xadiithkii Cammaar,)
,xadiithkii Cammaarna (lafdigiiisii wuxuu ahaa)

مررت بهم وهم يسبونك فنهيتهم فضربوني،

waxaan soo maray Gaaladii Quraysheed oo ku
caynaayaan (Nebi Muxammedow) waana ka reebay
,markaasay i garaaceen

وأنتم قيل لكم؛ نريد أن نضربكم)،

Adinkana (Yaxye iyo inta la jirtayba) waxaa la idin yiri,
waxaan rabnaa inaan idin garaacno (markaasaa
iyadoo aan la idin garaacin aad tiraahdeen Qur'aanku
,waa Makhluuq)

فقال يحيى:

:Yaxyena wuxuu yiri

(والله ما رأيت تحت أديم السماء أفقه في دين الله تعالى منك).

Allaah baan ku dhaartayee ma arkin qof ku nool)
Cirka hoostiisa oo kaaga faham badan Diinka Allaah
(kor ahaayee

ثم أخبر تعالى أن هؤلاء المرتدين الشارحين صدورهم
بالكفر،

Ka dibna Allaah koreeyee wuxuu sheegay in kuwaasi
Murtadiinta ah ee ku balaariyey quluubtooda
,gaalnimada

وإن كانوا يقطعون على الحق ويقولون:

haba ahaadeen kuwo rumeesan Xaqa (oo xaqa way u
ogyihiin xaq balse gaalnimo ayay doorteen) waxayna
:dhahaayaan

ما فعلنا هذا إلا خوفاً،

uma aanan sameenin arinkaani (gaalnimada aan ku
dhacnay) waxaan cabsi ka ahayn (cabsi ayaa inoo
gaysay)

فعلهم غضب من الله ولهم عذاب عظيم.

in kuwaasi dushooda ay (Allaah wuxuu sheegay)
.ahaatay Caro Allaah ayna mudan yihiin Cadaab wayn

ثم أخبر تعالى أن سبب هذا الكفر والعذاب

Ka dibna Allaah koreeyee wuxuu sheegay in sababta
ay ku timid gaalnimadaan iyo cadaabka

ليس بسبب الاعتقاد للشرك،

,inaysan ahayn sabab Rumeen ay Shirkiga rumeeyeen

أو الجهل بالتوحيد،

,ama Jahli looga sugan yahay Tawxiidka

أو البغض للدين،

, ama nacayb loo qabo Diinka

أو محبة الكفر،

ama Gaalnimo jacayl (mid arimahaasi ku timid ma
, ahan sababta gaalnimadooda)

وإنما سببه أن له في ذلك خطأ من حظوظ الدنيا،

ee wax kale ma ahan sababtiisu waa uun in qofka
gaalimadaasi ku dhacay ay gaalnimadaasi ugu sugan
tahay (uu ka helaayo oo keliya) Manfacu Manaaficda
,Aduunka ka mid ah (Aduuno Jacayl sababteeda)

فآثره على الدين وعلى رضى رب العالمين.

dheeftii Aduunyada ayuu ka doorbiday Diinka iyo
.Raali ahaanshiyaha Caalamiinta Rabigooda (Allaah)

فقال: {ذلك بأنهم استحبوا الحياة الدنيا على الآخرة

Allaah koreeyee wuxuu yiri: {arinkaasi (gaalimimada
iyo cadaabka) sababta uu ku dhacay inay tahay ayaga
oo jecelaystay nolosha dhaw (Aduunyada) kana
,jecleestay mida dambe (Aakhirada)

وأن الله لا يهدي القوم الكافرين}

Allaahna ma hanuuniyo Qawmka gaalada ah (dadka
,{uu Allaah inay gaalnimo ku dhintaan u qoray)

فكفرهم تعالى،

Allaah koreeyee wuu gaaleesiiyay kuwaasi (kuwa
,aduunyo jacayl Diinkooda uga tegay)

وأخبر أنه لا يهديهم مع كونهم يعتذرون بحجة الدنيا،

wuxuuna sheegay Allaah inuusan hanuuninaynin
kuwaasi weliba ayagoo ku andacoonaayaan
,Aduunyada Jacaylkeeda (Aduunyo jacayl)

ثم أخبر تعالى أن هؤلاء المرتدين

ka dibna wuxuu sheegay Allaah koreeyee in kuwaasi
Murtadiinta ah ay u ridoobeen

لأجل استحباب الدنيا على الآخرة،

,Aduunyada ay ka jeclaadeen Aakhirada darteeda

هم الذين طبع على قلوبهم وسمعهم وأبصارهم،

waa kuwa uu (Allaah) daboolay Laabtooda iyo
,Maqalkooda iyo Aragoodaba

وأنهم هم الغافلون.

waana ayaga kuwa Ghaafiliinta ah (kuwa hilmaamsan
,Allaah oo is moogaysiiya Xuquuqda Allaah)

**ثم أخبر خبراً مؤكداً محققاً أنهم في الآخرة هم
الخاسرون**

Ka dib wuxuu sheegay (Allaah) Hadal la adkeeyey oo weliba la sugay oo ah in kuwaasi ay Akhaarida .dhexdeeda ku yihiin Kuwa khasaaray

الدليل الخامس عشر: قوله تعالى عن أهل الكهف:

Daliilka shan iyo tobonaad : waa Qawlkaa Allaah uu ka : yiri Ahlul Kahfiga

{إنهم إن يظهروا عليكم يرموكم}

Ayaga (Gaalada) hadii ay idinka adkaadaan (oo ay } idin arkaan) Dhagax ayay idinku dilaayaan

أو يعيدوكم في ملتهم ولن تفلحوا إذاً أبداً

},

ama waxay idinku celinaayaan Diintooda (Diintooda shirkiga iyo gaalnimada ahayd) mana liibaanaysaan .{markaasi weligeeda

فذكر تعالى عن أهل الكهف أنهم ذكروا عن المشركين

Allaah koreeyee wuxuu ka sheegay Ahlul Kahfiga inay ka soo tebiyeen Mushrikiinta

أنهم إن قهروكم وغلبوكم،

,hadii ay idin muqiiniyaan ayna idinka adkaadaan

فهم بين أمرين:

laba arin midooda ayay ku sugnaanayaan

(sameenayaan) (laba kala daran ayay idin kala dooran :siinayaan)

إما أن يرموكم، أي يقتلوكم شرّاً قتلة بالرجم،

inay dhagax idinku dilaayaan , yacnii ay idin dilaan

,dilid mida u xun ee ah Dilida Dhegax ku dilida ah

وإما أن يعيدوكم في ملتهم ودينهم،

ama inay idiin celinaayaan Diinkooda iyo

,Dhaqankooda (labada kelimo waa isku mid)

{ولن تفلحوا إذاً أبداً}

mana liibaanaysaan markaasi weligiina (liibaan wad }

,{is dayseen)

أي وإن وافقتموهم على دينهم

yacnii hadii aad ku waafaqdaan Gaalada Diinkooda

بعد أن غلبوكم وقهروكم،

ka dib markay idinka adkaadaan ayna idin
,muquuniyaan

فلن تغلبوا إذاً أبداً،

,ma liibaanaysaan markaasi weligiina

فهذا حال من وافقهم بعد أن غلبوه،

arinkaani waa xaalka qofkii waafaga gaalada ka dib
,markay ka adkaadeen

فكيف بمن وافقهم وراسلهم من بعيد،

waa sidee (ka waran xaalka) qofkii waafaga Gaalada
una fariin dirsada (una qaylo dhaansada) meel fog
,(uga qaylo dhaansada / uga cid dirsada)

وأجابهم إلى ما طلبوا من غير غلبة ولا إكراه،

gaaladana ka ajiiba (u dhega nuglaada, aqbala) waxay
dalbadaan (oo ay uga baahdaan) iyadoo aan laga
,adkaanin qasabna uusan jirin

ومع ذلك يحسبون أنهم مهتدون؟.

Iyadoo ay sidaasi tahayna (waxaa intaasi sii dheer)
waxay u maleenaayaan inay ayagu yihiin Kuwa
.?hanuunsan (ka waran kuwa xaalkooda sidaan yahay)

الدليل السادس عشر: قوله تعالى:

:Daliilka lex iyo tobonaad: Qawlkii Allaah ee koreeyey

{ومن الناس من يعبد الله على حرف}

waxaa ka mid ah Dadka mid u caabuda Allaah dhinac }
(si shaki ku jirto Allaah u caabuda)

فإن أصابه خير اطمأن به

hadii uu asiibo (helo) Wanaag wuu ku xasilaa
,(Cibaadada Allaah)

وإن أصابته فتنة انقلب على وجهه

hadiise ay asiibto (ay ku dhacdo) imtixaan (dhibaato)
wuxuu u gadoomayaa (u noqonayaa) Wejigiisa
(dhabta ahaa Gaalnimadiisa ayuu la soo baxayaa)

خسر الدنيا والآخرة

qofkaasi wuu khasaaray Aduunka iyo Aakhiraba

ذلك هو الخسران المبين} الحج (آية: 11)

{arinkaasina isaga uun baa ah Khasaaraha cad
فأخبر تعالى أن من الناس من يعبد الله على حرف، أي
على طرف

Wuxuu sheegay Allaah koreeyee in ay ka mid yihiin
Dadka mid u caabuda Allaah dhinac yacnii gees(hal
lug Diinka kula jiro hadii uu dhibaato kala kulmana uu
,kala baxaayo halkii lug ee uu kula jiray Diinka)
{فإن أصابه خير} أي نصر وعز وصحة

yacnii Gar gaar iyo Cizo {hadii uu asiibo (helo) Khayr}
(Sharaf) iyo Caafimaad

وسعة وأمن وعافية، ونحو ذلك،
iyo Balaarni (Aduunyadoo loo kala furaa) iyo Nabad
,gelyo iyo Bed qabi (Cudur la'aan), iyo wixii la mid ah

{اطمأن به} أي ثبت وقال:
yacnii wuu {wuu ku xasilaa (Cibaadada Allaah)}
:sugnaadaa wuxuuna yiraahdaa

هذا دين حسن ما رأينا فيه إلا خيراً
Diinkaani wuu wanaagsan yahay waxaan wanaag
,ahaynna kuma arkin

{وإن أصابته فتنة} أي خوف ومرض وفقر ونحو ذلك
{ hadii ay asiibtana (ay ku dhacdo) Fitno (dhibaato)}
,yacnii Cabsi iyo Jiro iyo Faqri iyo wixii la mid ah
{انقلب على وجهه}

wuxuu u gadoomayaa wejigiisa (asalka ahaa/ }
,{gaalnimo)

أي ارتد عن دينه ورجع إلى أهل الشرك.
yacnii wuxuu ka noqonayaa Diinkiisa wuxuuna u
.noqonayaa Ahlu Shirkiga

فهذه الآية مطابقة لحال المنقلبين عن دينهم
Aayadaani waxay daboolaysaa Xaalka kuwa ka
gadoomay Diinkooda

في هذه الفتنة،
Fitnadaan aan hada ku dhex jirno (Diinkoodii uga
,baxay)

يعبدون الله على حرف، أي على طرف،
waxay Allaah ku caabudayaan Dhinac, yacnii Gees (si
aan dhamaystirnayn u caabuda Allaah)

ليسوا ممن يعبد الله على يقين وثبات،
oo kama mid ahayn Cida Allaah ku caabuda Hubanti
,iyo Sugnaanshiyo

فلما أصابتهم هذه الفتنة انقلبوا عن دينهم،
markay asiibtay (ay ku dhacday) Fitnadaan
,(Imtixaankaan) waxay ka noqdeen Diinkoodii

وأظهروا موافقة المشركين،
waxayna muujisteen (oo ay banaanka ula soo baxeen)
,Muwaafaqada (ku raacsanaanta) Mushrikiinta
وأعطوهم الطاعة،

waxayna siiyeen Mushrikiinta Daacada (ka amar
,qaadashada iyo ka talo qaadashada)

وخرجوا عن جماعة المسلمين إلى جماعة المشركين،
waxayna ka baxeen Kulankii Muslimiinta waxayna u
,baxeen Kulankii Mushrikiinta

فهم معهم في الآخرة،
Aakhirana Gaalada ayay la jiraan (oo waa isku meel
,iyo isku abaal marin)

كما هم معهم في الدنيا،
siday Aduunka (inta la joogo) ay ula jiraan Gaalada
,(oo ay isku meel uga soo wada jeedaan)

فخسروا الدنيا والآخرة، ذلك هو الخسران المبين.
wayna khasaareen Aduunka iyo Aakhiradaba,
.Arinkaasina waa Khasaarada cad

هذا مع أن كثيراً منهم في عافية،
Weliba iyadoo ay sidaasi tahay in badan oo ayaga ka
,mid ah waxay ku sugnaayeen Caafiyah (Bed qabi)

ما آتاهم من عدو،
,Cadaw uma imaanin kuwaasi

إنما ساء ظنهم بالله،
ee waxaa uun xumaaday Malihii ay Allaah ka
,maleeyeen

فطنوا أنه يدل الباطل وأهله على الحق وأهله،
waxay maleeyeen inuu Allaah libinta siinaayo Baadilka
iyo Ahlu-Baadilka uu ka libin siinaayo Xaqa iyo Ahlu-
, Xaqa (laf ayay toobin ku qabteen)

فأرداهم سوء ظنهم بالله،
waxaa halaagay kuwaasi maladoodii xumayd ee ay
,Allaah ka maleeysteen

كما قال تعالى فيمن ظن به ظن السوء:
siduu Allaah koreeyee ka yiri Cidii malaha xun Allaah
: ka maleesey Asigoo ka hadlaayo

**{وذلكم ظنكم الذي ظننتم بربكم أرداكم فأصبحتم من
الخاسرين}. فصلت (آية: 23)**

Arinkiinaasina waa malihiina aad u malayseen }
Rabigiina kaas (maladaas) ayaa idin halaagay
.{waxaadna ka mid noqoteen Kuwa khasaaray
sheekha meeshaan dar daaran ayuu kuugu siinayaa)
:(wuxuu yiri

وأنت يا من منَّ الله عليه بالثبات على الإسلام،
Adiga Midkaan uu Allaah ku galadaystayoow ku
,sugnaanshiyaha Islaamka

أحذر أن يدخل في قلبك شيء من الريب،
ka digtoonoo inuu galo qalbigaaga wax ka mid ah
,Shakiga (shaki inuu qalbigaaga galo iska jir)

أو تحسين أمر هؤلاء المرتدين،
ama wanaajin (inaad wanaag u qirto) arinka kuwaani
,Murtadiinta ah (iska jir yaysan kuu soo dhuumanin)

أو أن موافقتهم للمشركين
ama in Waafaqidooda ay Mushrkiinta waa faqeen

وإظهار طاعتهم رأي حسن،
iyo Muujisashada ay muujisteen Daacada (amar ka
qaadashada) Mushrikiinta Ra'yi wanaagsan (inaad u
aragto iska jir weliba adigoo qiil uga dhigaayo aad
,tiraahdid nimankaani waxay sidaasi u sameeyeen)

حذراً على الأنفس والأموال والمحارم،
u taxadirid ay Nafsadaha iyo Maalyaalka iyo Dumarka
ay u taxadiraayeen (ayay sidaasi u sameeyeen ha

dhihin, ha taxsiininin , Ra'yi wanaagsan ha ku
,tilmaamin)

فإن هذه الشبهة

sababtoo ah Shubhadaani

هي التي أوقعت كثيراً

waa midi ay ugu dheceen in badan

من الأولين والآخرين

oo ka mid ah Dadkii hore iyo Kuwii dambaba

في الشرك بالله،

,Cibaado la wadaajinta Allaah

ولم يعذرهم الله بذلك،

,Allaah na uguma cudur daarin kuwaasi arinkaasi

وإلا فكثير منهم يعرفون الحق،

hadii uusan arinku sidaasi ahayn in badan oo ayaga

,(gaalada) ka mid ah way garanaayaan Xaqa

ويعتقدونه بقلوبهم،

wayna ka rumeesan yihiin Quluubtooda (oo waxaani

,inuu Xaq yahay Qalbiga way ka ogyihiin)

وإنما يدينون بالشرك للأعداء الثمانية

waxay uun uga Diin dhiganaayaan Shirkiga waa Cudur

daaryaasha sideeda ah

التي ذكرها الله في كتابه،

,taasoo uu Allaah ku sheegay Kitaabkiisa

فلم يعذر بها أحداً ولا ببعضها،

Allaahna qofka cudur daar (mar marsiinyo) ugama

,dhigin sideedaas arimood ama qaarkooda

فقال: { قل إن كان آباؤكم وأبناؤكم وإخوانكم

wuxuu yiri (Allaah) : { waxaad dhahdaa hadaad

Aabayaalkiina iyo Caruurtiina iyo walaalihiina

وأزواجكم وعشيرتكم

iyo Xaasaskiina iyo Qaraabadiina

وأموال اقترفتموها

iyo Xoolo aad kasbateen

وتجارة تخشون كسادها

iyo Ganacsi aad ka cabsanaysaan baarideeda (inay

idinku baarto)

ومساكن ترضونها

iyo Guryo aad ka raali tihiin

أحب إليكم من الله ورسوله وجهاد في سبيله

Aad ka jeceshihiin Allaah iyo Rasuulkiisa iyo Jihaad

,Jidkiisa ah (Allaah wadadiisa oo lagu halgamo)

فتربصوا حتى يأتي الله بأمره

, suga inta uu Allaah ka keenaayo Arinkiisa

والله لا يهدي القوم الفاسقين. { التوبة (آية:24)

.{ Allaahna ma hanuuniyo Ummada Faasiqiinta ah

الدليل السابع عشر: قوله تعالى:

:Daliilka todobo iyo tobonaad: Qawlkiisa koreeyee

{إن الذين ارتدوا على أدبارهم

kuwa u laabtay dabadoodii (kuwa ridoobay ee }

gaalnimo dib ugu noqday)

من بعد ما تبين لهم الهدى

ka dib intuu u cadaaday Hanuunka (hanuunka markuu

u cadaaday ka dib)

الشیطان سول لهم وأملی لهم *

Shaydaanka ayaa u qurxiyay (Baadida) yididiilo (been

*ahna) u yaboohay

ذلك بأنهم قالوا للذين كرهوا ما نزل الله

Arinkaasina waxaa ugu wacan (sababtiisu ay tahay)

inay kuwa ridoobay ku dheheen kuwa nacay wuxuu

Allaah soo dejiyey

سنطيعكم في بعض الأمر

waxaan idinku (waafaqaynaa) adeecaynaa arinka

qaarkiisa (la colaytanka Nebiga scw)

والله يعلم إسرارهم *

*Allaahna wuu ogyahay wax yaabahooda u qarsan

فكيف إذا توفتهم الملائكة

ee sidee ayuu noqon doonaa (xukunka iyo xaalka)

markay nafta ka qaadayso kuwaasi Malaa'igta

يضربون وجوههم وأدبارهم *

iyagoo ka garaacayaan wejigooda iyo
*gadaashoodaba

ذلك بأنهم اتبعوا ما أسخط الله

Arinkaasina waxaa ugu wacan inay raaceen kuwaasi
,wax Allaah caro gelinaayo

وكرهوا رضوانه

,waxayna naceen Raali ahaanshiyaha Allaah

فأحبط أعمالهم} . محمد (آية: 25)

.{markaasuu Allaah buriyay (hoobiyay) Acmaashoodii

فذكر تعالى عن المرتدين على أدبارهم

Allaah koreeyee Wuxuu ka sheegay kuwaasi
murtadiinta ah ee gadaashoodii (gaalnimo) u noqday

أنهم من بعد ما تبين لهم الهدى ارتدّوا على علم،

in ay (ridoobeen) ka dib markuu u cadaaday Hanuunka
,oo waxay ridoobeen ogaal dushiisa (ayagoo og)

ولم ينفعهم علمهم بالحق مع الردة،

waxna uma tarin ogaanshiyahoodii Xaqa ay Ridada la
socotay (Xaqa laga noqday ogaanshiyo waxba ugama
,tarto bal hadii aan lagu camal falin ayuu waxba tarin)

وَعَرَّهْمُ الشَّيْطَانُ بِتَسْوِيلِهِ،

,Shaydaanka ayaa ku kediyaay u qurxintiisa (baadilka)

وتزيين ما ارتكبوا من الردة،

iyu u qurxintuu u qurxiyey waxay koreen (ay ku
,dhaceen) oo Diin ka noqoshada ah

وهكذا حال هؤلاء المرتدين في هذه الفتنة،

waxaa sidaasoo kale ah Xaalka kuwaan Murtadiinta ah
,ee ku ridoobay Fitnadaan (Dhibkaan hada taagan)

عرهم الشيطان،

,Shaydaan baa dagay (kediyaay)

وأوهمهم أن الخوف عذر لهم في الردة،

wuxuu moodsiyay in cabsida ay cudur daar ugu tahay
,Ridada (Diin ka baxa ay ku dhaceen)

وأنهم بمعرفة الحق ومحبتة والشهادة به

iyo in ay xaqqa garanaayaan darteed iyo xaq jeclaanta
darteeda iyo ka marqaati kaca ay xaqqa ka marqaati
kacaayaan (qiraayaan) awgeed

لا يضرهم ما فعلوه،

ma dhibaayo ayaga (wax dhibaato ah kama soo
gaaraayo Diinkooda iyo ayagaba) waxay sameeyeen
,(sidaasi ayuu ku kediyeen Shaydaanka)

ونسوا أن كثيراً من المشركين

waxayna hilmaameen in inbadan oo ka mid ah
Mushrikiinta

يعرفون الحق ويحبونه ويشهدون به،

ay garanaayaan Xaqqa ayna jecelyihiin ayna qirayaan
,xaqa (inuu xaq yahay)

ولكن يتركون متابعتة والعمل به محبة للدين،

balse ay uga tagaayaan xaqqa raacidiisa iyo ku camal
,falkiisa ay tahay Aduunyo jacayl

وخوفاً على النفس والأموال،

,iyo Cabsi ay u cabsanayaan Nafsadaha iyo Hantida

والمآكل والرئاسات.

iyo Cuntooyinka (masaariifta/biilalka) iyo kuraastii
,(madax tinimo / kursi jacayl)

ثم قال تعالى:

:Ka dibna Allaah koreeyee wuxuu yiri

{ ذلك بأنهم قالوا للذين كرهوا ما نزل الله

Arinkaasina waxaa ugu wacan inay kuwa ridoobay ku}
dheheen kuwa nacay wuxuu Allaah soo dejiyey

سنطيعكم في بعض الأمر،

waxaan idinku (waafaqaynaa) adeecaynaa arinka }
,{qaarkiisa (la colaytanka Nebiga scw)

فأخبر تعالى أن سبب ما جرى عليهم من الردة،

Allaah koreeyee wuxuu sheegay in sababta waxa ku
,dul socday (ay ugu dhaceen) Ridada

وتسويل الشيطان، وإملائه لهم،

iyo qurxinta Shaydaanka iyo yididiiladiisa (beenta ah)
,ee uu ayaga geliyay

هو قولهم للذين كرهوا ما نزل الله:

hadalkoodii ay ku dheheen (inay ahayd sababtaasi)
:kuwii kahday (nacay) wuxuu Allaah soo dejiyay

{ سنطيعكم في بعض الأمر } ،

waxaan idinku (waafaqaynaa) adeecaynaa arinka }

,{qaarkiisa (la colaytanka Nebiga scw)

فإذا كان من وعد المشركين الكارهين

haduu yahay qofkii u yabooha (u balan qaada)

Mushrikiinta kohonaysa (neceb)

لما أنزل الله بطاعتهم في بعض الأمر كافرين،

wuxuu Allaah soo dejiyay inuu ku adeecaayo (ku

waafaqaayo) arinka qaarkiisa (uu qofkaasi ku

,noqonaayo arintaasi darteeda) Gaal

وإن لم يفعل ما وعدهم به،

Yuusanba sameenin (ficil ahaan u sameenin) wuxuu u

,yaboohay (u balan qaaday) Mushrikiina

فكيف بمن وافق المشركين الكارهين

waa sidee (ka waran xukunka iyo xaalka) qofkii

waafaqa Mushrikiinta kohonaysa (neceb)

لما أنزل الله من الأمر بعبادته وحده لا شريك له،

wuxuu soo dejiyay Allaah ee ah is amrida Cibaadada

Allaah keligiisa (uu mudan yahay) cid la wadaagtana

,aysan jirin

وترك عبادة ما سواه

iyo in laga tago Cibaadada wixii Allaah ka soo hara

من الأنداد والطواغيت والأموات،

oo ay ka mid yihiin kuwa lala simo (dhig yaalka Allaah

lala dhigo) iyo kuwa xadgudbay iyo kuwa dhintay

,(qabuuraha lagu sheego awliyada iwm)

وأظهر أنهم على هدى،

,muujiyayna inay ku dul sugan yihiin gaalada hanuun

وأن أهل التوحيد مخطئون في قتالهم،

iyo in kuwa Ahlu Tawxiidka ay yihiin kuwa ku khaldan

,dagaalkooda (ay gaalada kula jiraan)

وَأَنْ الصَّوَابُ فِي مَسْأَلَتِهِمْ،

sawaabkana (waxa saxan , wanaagana uu ku jiro in uu ,yahay) in lala heshiiyo Gaalada

وَالدَّخُولُ فِي دِينِهِمُ الْبَاطِلُ؟!

iyo in loo galo (la hoos yimaado) Diinkooda
(Dhaqanka gaalada) baadilka ah (qofka fikirkiisa iyo
ficilkiisa sidaan yahay ka waran xukunkiisa iyo
xaalkiisa?! (nin dhintay iyo nin aan waxba ogayn oo
.keliya ayuu ka qarsan yahay ninkaan xukunkiisa)

فَهَؤُلَاءِ أَوْلَى بِالرَّدِّ

Kuwaan ayaa ka mudan Diin ka baxa (Riddada)

مَنْ أَوْلَىكَ الَّذِينَ وَعَدُوا الْمَشْرِكِينَ

oo waxay ka mudan yihiin kuwii u balan qaaday (u
yaboohay) Mushrikiinta

بَطَاعَتِهِمْ فِي بَعْضِ الْأَمْرِ،

inay ku adeecayaan (ku waafaqayaan) Mushrikiinta
,arinka qaarkiisa

ثُمَّ أَخْبَرَ عَنْ حَالِهِمُ الْفَطِيحُ عِنْدَ الْمَوْتِ،

ka dib Allaah wuxuu ka waramay xaaladoodii xumayd
,ee liidatay (ee foosha xumayd) markay dhimanayaan

ثُمَّ قَالَ: { ذَلِكَ } أَيُّ الْأَمْرِ الْفَطِيحُ عِنْدَ الْوَفَاةِ

ka dibna Allaah wuxuu yiri: { Arinkaasi } yacnii Arinka
liita ee xun ee dhacaaya geerida agteeda

{ بِأَنَّهُمْ اتَّبَعُوا مَا أَصْخَطَ اللَّهَ }

Arinkaasina waxaa ugu wacan inay raaceen kuwaasi }
,wax Allaah caro gelinaayo

وَكْرَهُوا رِضْوَانَهُ فَأَحْبَطَ أَعْمَالَهُمْ } . محمد (آية: 25)

waxayna naceen Raali ahaanshiya Allaah, markaasuu
. {Allaah buriyay (hoobiyay) Acmaashoodii

وَلَا يَسْتَرِيبُ مُسْلِمٌ أَنْ اتَّبَعَ الْمَشْرِكِينَ،

Qof Muslim ah kama shakinaayo in Raacitaanka
,Mushrikiinta la raaco

وَالدَّخُولُ فِي جَمَلَتِهِمْ،

iyo u gelitaanka Gaalada la galo Jumladooda (Safka
,Mushrikiinta oo la galo)

والشهادة أنهم على حق،

iyo Qiritaanka la qiro (Marqaati kaca la marqaati kaco)
,inay xaq ku dul sugan yihiin Mushrikiinta

ومعاونتهم على زوال التوحيد وأهله،

iyo ku kaalmayntooda lagu kaalmeeyo Mushrikiinta
,Baa bi'inta (Tir tirida) Tawxiidka iyo Ahalkiisa

ونصرة القباب والقحاب واللواط،

iyo u gar gaarida loo gar gaaro Qubbadaha iyo
,Sharmuutooyinka iyo Khaniisiinta

من اتباع ما يسخط الله،

In (qof muslim ah kama shakinaayo waxaas oo dhan)
ay ka mid yihiin Raacid la raaco wax Allaah caro
,gelinaayo

وكرهه رضوانه،

iyo in la kohdo (la noco) Raali ahaanshiyaha Allaah
(waa run ilayn arimahaasi oo dhan waxay ku imaan
karaan oo keliya in la raaco caro gelinta Allaah iyo
,iyadoo la necbeesto raali ahaanshiyaha Allaah)

وإن ادعوا أن ذلك لأجل الخوف،

haba sheegteen (cida arinkaasi sameesay) in
,arinkaasi ku dhacay (u sameeyeen) Cabsi darteeda

فإن الله ما عذر أهل الردة بالخوف من المشركين،

Allaahna uguma cudur daarin Kuwii ridoobay Cabsi ay
,ka cabsanaayeen Mushrikiinta darteeda

بل نهى عن خوفهم

bal (iskaba dhaafee) wuxuu reebay Allaah (oo uu
,diiday) in laga cabsado Mushrikiinta

فأين هذا ممن يقول:

:halkee ayuu ka joogaa arinkaani midka dhahaayo

ما جرى منّا شيء ونحن على ديننا

waxba nagama dureera (wax khalad ah ma gelin .
.anaga) waxaana ku dul sugannahay Diinkeena

الدليل الثامن عشر: قوله تعالى:

:Daliilka sideed iyo tobonaad: Qowlkiisa koreeyee

{ألم تر إلى الذين نافقوا}

miyaadan ogayn oodan arkin {Nebi Muxammedow} }

kuwii munaafaqoobay (Munaafiqiinta)

يقولون لإخوانهم الذين كفروا من أهل الكتاب

oo ku dhahaayaan walaalahooda (xaga Diinta) ee ahaa

kuwii gaaloobay ee Ahlu Kitaabka ahaa (Yahuuda)

لئن أخرجتم لنخرجن معكم

hadii la idin bixiyo (la idin saaro) waan idin la

baxeenaa (adinkaan idin raacaynaa)

ولا نطيع فيكم أحداً أبداً

Kumana adeeceeeno arinkiina qofna weligeeda (in la

,idin dhibaateeyo cidna kama yeeleeno weligeeda)

وإن قوتلتم لننصرنكم

hadii la idin la dagaalamana waan idin gar gaareenaa

(waan idin hiilinaynaa oo danaano ayaa naga

,dhaxeesa ilayn walaalo ayaan nahayee)

والله يشهد إنهم لكاذبون }

Allaahna wuxuu marag ka yahay (og yahay) inay

.Beenaalayaal yihiin

فعقد تعالى الأخوة بين المنافقين والكفار،

Allaah koreeyee wuxuu guntay (oo uu xiray) walaal

,tinimada ka dhaxeesa Munaafiqiinta iyo Gaalada

وأخبر أنهم يقولون لهم في السر:

wuxuuna Allaah sheegay in Munaafiqiinta ay ku

:dhahayaan Gaalada si hoose (oo sir ah)

{لئن أخرجتم لنخرجن معكم}

hadii la idin bixiyo (la idin saaro) waan idin la

baxeenaa (adinkaan idin raacaynaa)

أي لئن غلبكم محمد صلى الله عليه وسلم وأخرجكم من بلادكم

yacnii hadii uu idinka adkaado Muxammed scw uuna

idinka bixiyo (idinka saaro) Baladkiina (magaaladiina)

{لنخرجن معكم ولا نطيع فيكم أحداً أبداً};

waan idin la baxeenaa (adinkaan idin raacaynaa),
Kumana adeeceeeno arinkiina qofna weligeeda (in la
,idin dhibaateeyo cidna kama yeeleeno weligeeda)
أي لا نسمع من أحد فيكم قولاً،

yacnii qofna kama maqleeno (kana dhagaysaneeno)
Hadal ku saabsan arinkiina (hadal ama ficil la idinku
,dhibaateenaayo qofna kama aqbaleeno)

ولا نعطي فيكم طاعة.

qofna kuma siinayno arinkiina Daaco (war ka yeelid)

{وإن قوتلتم لننصرنكم}؛

hadii la idin la dagaalama waan idin gar gaareenaa
(waan idin hiilinaynaa oo danaano ayaa naga
,dhaxeesa ilayn walaalo aan is hurin ayaynu nahnay)

أي إن قاتلكم محمد صلى الله عليه وسلم لننصرنكم

yacnii hadii uu idin la diriro (idin la dagaalamo)
Muxammed scw waan idin gar gaareenaa (waan idin
hiilineenaa hoo iyo hiil ayaan diyaar idinkula nahnay)

ونكون معكم،

waxaana ahaanaynaa kuwo adinka idin la jira (safkiina
ayaan ku jirnaa , dhiigeena ayaa meel iskula
,daadanaayo dhimasho iyo dhaawacba)

ثم شهد تعالى أنهم كاذبون في هذا القول،

ka dib Allaah wuxuu qiray inay Munaafiqiintu yihiin
,kuwo ku been sheegaayo hadalkaan (ay dhahayaan)

فإذا كان وعد المشركين

Mushrikiinta u yaboohooda (u balan qaadidooda) hadii
uu yahay (oo weliba)

في السر بالدخول معهم ونصرهم،

si hoose loogu balan qaado in lala gelaayo Gaalada
(mashruuca Muslim la dagaalanka) iyo u hiilintooda (u
,gar gaaridooda af iyo idinba lagu taageero)

والخروج معهم إن أجلوا،

iyo in lala baxaayo Gaalada hadii la saaro (la tarxiilo)
(ka waran hadii arinkaasi yahay)

نفاقاً وكفرأً وإن كان كذباً،

Munaafaqnimo iyo Gaalnimo Beenba ha noqdo
,(Yabooahaasi / Balanqaadkaasi)

فكيف بمن أظهر ذلك صادقاً،

waa sidee (ka waran xukunka iyo xaalka) qofka
,muujista arinkaasi asigoo ku run sheegaayo

وقدم عليهم،

,una taga gaalada (safkooda gala)

ودخل في طاعتهم،

Daacada (Maamulka) gaaladana hoos gala (ka amar
,qaata oo talada Gaalada ku shaqeeya)

ودعا إليها،

,oo (weliba Dadka) ugu yeera Daacada Gaalada

ونصرهم وانقاد لهم،

,una gar gaara (u hiiliya) gaalada una hogaansama

وصار من جملتهم،

,kana mid noqda Jumladooda (safka gaalada ku biira)

وأعانهم بالمال والرأي،

,kuna kaalmeeyay gaalada Maal iyo Ra'yi

هذا مع أن المنافقين لم يفعلوا ذلك

iyadoo ay sidaani ay tahay Munaafiqiinta uma
sameenin arinkaasi

إلا خوفاً من الدوائر،

waxaan ka ahayn Cabsi ay ka cabsanaayeen

,Musiibooyinka (dhibaato ka carar)

كما قال تعالى:

:siduu Allaah koreeye yiri

{فترى الذين في قلوبهم مرض

waxaad arkaysaa kuwa ay quluubtooda ay ku jirto }

Jiro (kuwa qalbiga ka buka waa Munaafiqiinta)

يسارعون فيهم

oo u deg degaayo dhexdooda (Gaalada xageeda

ayagoo mar kasta u rucleenaayo ayaad arkaysaa)

يقولون نخشى أن تصيبنا دائرة..{ المائدة (آية:52):

waxay dhahaayaan waxaanu ka cabsaneenaa inay na

.asiibto (nagu dhacdo) Musiibo (Dhibaato)

وكذا حال كثير من المرتدين في هذه الفتنة،

Waana sidaasi in badan xaaladooda oo ka mid ah
,Murtadiinta ku diroobay Fitnadaan

فإن عذر كثير منهم هو هذا العذر

cudurdaarka ay ku cudur daarteen in badan oo ka mid
ah kuwa ridoobay wuxuu yahay cudurdaarkaan

الذي ذكره الله عن الذين في قلوبهم مرض

oo ah midkii uu Allaah ka sheegay kuwa ay ku jirto
quluubtooda Jiro (kuwa ay quluubtooda bukto)

ولم يعذرهم به.

uguma cudur daarin waxaasi (ay (Allaahna)
.sheeganayaan oo ah inay dhibaato ka cabsanayeen)

قال الله تعالى: { فعسى الله أن يأتي بالفتح

Allaah koreeyee wuxuu yiri: {Allaah wuxuu mudan
yahay inuu la yimaado (keeno) Fatxi (Furasho , Guul,
Gargaar)

أو أمر من عنده

ama (uu la yimaado/ keeno) Arin Allaah xagiisa ka
ahaaday (inuu si kaleba u halaago gaalada siduu
doono)

فيصبحوا على ما أسروا في أنفسهم نادمين *

oo ay markaasi waaberiistaan ayagoo waxay
nafsadooda ku sireesteen (ku qarsadeen) (oo Gaal
*jacayl ah) ayagoo ah kuwo ka qoomameeya

ويقول الذين آمنوا

kuwii Xaqa rumeeyeyna waxay dhahayaan

أهؤلاء الذين أقسموا بالله جهد أيمانهم إنهم لمعكم

ma kuwaasaa Kuwii ku dhaartay Allaah Dhaartooda
adag (Dhaartooda meeshii u dambeesay) (waxay ku
,dhaaran jireen) inay idin la jiraan (Muslimiinay)

حبطت أعمالهم فأصبحوا خاسرين،

waxaa hoobtay (buray) Acmaashoodii waxayna

*ahaadeen (noqdeen) kuwo khasaaray

ثم قال تعالى:

:ka dibna Allaah koreeyee wuxuu yiri

{يا أيها الذين آمنوا من يرد منكم عن دينه

Kuwa (Xaqa) remeeyayoow Ruuxii ka Ridooba (ka }
,noqda) Diinkiisa oo Adinka idinka mid ah

فسوف يأتي الله بقوم يحبهم ويحبونه

wuxuu Allaah keenayaa Qoom uu jecelyahay iyagana
,ay jecelyihiin Allaah

أدلة على المؤمنين أعزّة على الكافرين، المائدة (آية:52-
54-53

u nugul (u naxariista) Mu'miniinta kuna daran (ku
,{kakan / ku ad adag) Gaalada

فأخبر تعالى أنه لا بد عند وجود المرتدين

Wuxuu sheegay Allaah koreeyee in ay lagama
maarmaan tahay hadii la helo Murtadiin

من وجود المحبين المحبوبين المجاهدين،

in la helaayo (ay jirayaan) kuwo (Allaah iyo Diinkiisa)
jecel ayagana la jecel yahay (Allaah uu jecel yahay)
,oona Mujaahidiin ah (Halgamaayaal ah)

ووصفهم بالذلة والتواضع للمؤمنين،

wuxuuna Allaah ku tilmaamay (Muslimiinta
Mujaahidiinta ah) kuwo u nugul oo u jajaban (u
,miskiinsan , u dabacsan) Mu'miniinta

والعزّة والغلظة والشدة على الكافرين،

iyo Sharaf (Gobonimo) iyo Adkaanshaha iyo
Darnaanshiyaha (ka kanaanshiyaha) ay Gaalada ku
,daran yihiin (ayuu Allaah ku tilmaamay)

بضد من كان تواضعه وذله ولينه لعباد القباب،

wuxuu qofkaasi ka soo hor jeedaa (uu khilaaf san
yahay) qofkii tawaaduciisa iyo isu duleentiisa iyo u
dabac sanaantiisa ay leeyihiin (siiya) kuwa
,Qubbadaha caabuda (Mushrikiinta)

وأهل القباب واللواط،

iyo kuwa Sharmuutooyinka iyo Khaniisooyinka Ahalka
u ah, (dhinaca kalena)

وعزته وغلظته على أهل التوحيد والإخلاص،

sharaftiisa (quwadiisa iyo kartidiisa) iyo ka
kanaantiisa (ad adeegiisa) waxay saaran tahay (u
,isticmaalaa) Ahlu Tawxiidka iyo ikhlaaska

فكفى بهذا دليلاً

arinkaan ayaa kuugu filan Daliil (ku saabsan)

على كفر من وافقهم

gaalnimada qofka waafaqa gaalada

وإن ادعى أنه خائف،

,haba sheegto inuu yahay mid cabsanaayo

فقد قال تعالى: {ولا يخافون لومة لائم}

dhab ahaantii Allaah koreeyee wuxuu yiri: { kama }

cabsadaan (Muslimiinta dhabta ah) mid wax canaanta canaantiisa}

وهذا بضد من يترك الصدق والجهاد

Midkaana (Muslimka ay Aayada sheegtay) waa Lidka

(midka ka soo hor jeeda) Midka ka taga Runta iyo

Jihaadka (Halganka xaq ah)

خوفاً من المشركين،

sidaasina u sameenaya cabsi uu ka qabo Mushrikiinta

,(Gaalada)

ثم قال تعالى: {يجاهدون في سبيل الله}

ka dibna Allaah koreeyee wuxuu yiri: {waxay ku

,dagaalamaan (Muslimiinta dhabta ah) wadada Allaah}

أي في توحيده،

yacnii waxay ku dagaalamaan Tawxiidka Allaah (siday

,ku taxqiijin lahaayeen)

صابرين على ذلك

waana kuwo ku sabraaya arinkaasi (dhibaato kasta oo

af iyo adin ba loogu gaysto way ku sabraan waxayna

sidaasi u yeelayaan)

ابتغاء وجه ربهم

Dalbid ay dalbayaan Wejiga Rabigooda (inay hor

istaagaan Asigoo raali ka ah ayagana ay raali ka yihiin

Aakhiro) (Aduunyadana waxay u dagaalamayaan)

لتكون كلمة الله هي العليا،

inay Kelimada Allaah noqoto Mida u Sareesa (ee aan

,laga sareenin ee ka talisa Caalamkaan)

ولا يخافون لومة لائم،

,kamana cabsadaan midka wax canaanta canaantiisa

أي لا يبالون بمن لا مهم وآذاهم في دينهم،
yacnii uma aabayeelaan (uma jaxaan jixaan) Cidii ku
,canaanata kuna dhibaateesa Diinkooda dartiisa

بل يمضون على دينهم،
bal waxay ku soconayaan (oo ay ku dul
,sugnaanayaan) Diinkooda (Xaqa ah)

يجاهدون فيه
waxay u dagaalamaayaan (u halgamaayaan)
Diinkooda dartiisa

غير ملتفتين للوم أحد من الخلق
ayagoon milicsaneenin (u jaleeceedin) canaan uu
canaantay qof ka mid ah Khalqiga

ولا لسخطه ولا لرضاه،
Walaa caradiisana (xanaagiisana aan u aabayeeleenin)
iyo raali ahaan shiyahiisa (qofkii Diinkooda dartiisa
uga xanaaqa ama raali uga ah midna arinkooda uma
,joojiyaan oo cibaadadooda ayay ka wataan)

إنما همتهم وغاية مطلوبهم
himadooda (walbahaarkooda) iyo waxa ay rabaan
waxa u dambeeya (hamiga ay hiigsanaayaan)

رضى سيدهم ومعبودهم،
wuxuu yahay Raali ahaanshiyaha Sayidkooda iyo
,Macbuudkooda (Midka ay caabudaan waa Allaah)

والهرب من سخطه.
iyo ka cararid ay ka cararayaan Carada Allaah
,(himadooda iyo halka ay hiigsanaayaan waa taas)

وهذا بخلاف
Qofkaan sidaan ahna wuxuu khilaafsan yahay (uu ka
duwan yahay)

من كانت همته وغاية مطلوبه
midka ay himadiisu ahaatay iyo waxa uu rabo waxa u
dambeeya

رضى عبّاد القبّاب،
,raali ahaanshiyaha kuwa caabuda Qubbadaha

وأهل القحّاب واللواط ورجائهم،
iyo Ahalka kuwa dhileesta iyo Khaniisiinta, iyo
,rajayntooda ay kuwaasi rajeenaayaan

والهرب مما يسخطهم،
,iyo ka cararidda uu ka cararaayo wixii caro gelinaayo
فإن هذا غاية الضلال والخذلان.
arinkaanina waa meesha u dambeesa baadida iyo
.hooga (ayaan darada)

ثم قال تعالى: {ذلك فضل الله
Ka dibna Allaah koreeyee wuxuu yiri: {arinkaasi (inuu
Allaah kaa dhigo Muslim Muwaxid ah oo Muslimiinta
jecel gaaladana ku kakan) waa Fadliga Allaah
يؤتيه من يشاء
wuxuu siiyaa Ciduu doono

والله واسع عليم،
Allaahna waa Mid ay (wax Siintiisu) ay balaaran tahay
,{Ogaalna badan
فأخبر تعالى أن هذا الخير العظيم، والصفات الحميدة
Allaah koreeyee wuxuu sheegay in Khayrkaan waynka
ah, iyo Tilmaamahaan la mahadiyo
لأهل الإيمان الثابتين على دينهم عند وقوع الفتن،
ee u sugnaaday Kuwa iimaanka leh ee ku sugan
,Diinkooda marka ay Fidnada dhaceeso

ليس بحولهم ولا بقوتهم،
inuusan arinkaasi ku ahaanin (ku imaanin)
,Xeeladooda iyo Quwadooda midna
وإنما هو فضل الله يؤتيه من يشاء
ee uu yahay oo keliya Fadliga Allaah ee uu siiyo Ciduu
doono

والله ذو الفضل العظيم،
Allaahna waa Allaha Fadliga waynka u saaxiibka ah
,(iska leh)

كما قال تعالى : {يختص برحمته من يشاء
siduu yiri Allaah koreeyee: { Allaah wuxuu ku gaar
yeelaa Naxariistiisa Ciduu doono

والله ذو الفضل العظيم
Allaahna waa Allaaha u saaxiibka ah Fadliga waynka
,{ah (iska leh)

ثم قال: {إنما وليكم الله ورسوله والذين آمنوا

ka dib Allaah wuxuu yiri: { Weligiina (Gar gaarihiina
iyo Gacalkiina iyo Garabkiina) waa uun Allaah iyo
Rasuulkiisa iyo Kuwa Xaqa rumeeyey
الذين يقيمون الصلاة ويؤتون الزكاة وهم راکعون،
ee ah Kuwa ooga Salaada bixiyana Zakada ayagoo
,{rukuucsan (yacnii qaab kasta ayay u bixiyaan)
فأخبر تعالى خبراً بمعنى

Allaah koreeyee wuxuu sheegay Hadal uu macnihiisu
yahay

الأمر بولاية الله ورسوله والمؤمنين
Amarka ah in laga Gacal (Sukeeyo) dhigto Allaah iyo
,Rasuulkiisa iyo Mu'miniinta

وفي ضمنه
waxa arinkaasi uu xambaarsan yahayna uu yahay
النهي عن موالاة أعداء الله ورسوله والمؤمنين.
in laga reebtoonaado (laga joogsado) ka gacal
dhigashada Cadawyaasha Allaah iyo Rasuulkiisa iyo
.Mu'miniinta

ولا يخفى أي الحزبين أقرب
Mana qarsoona labada Xizbi (labda kooxood) midka u
dhow

إلى الله ورسوله وإقام الصلاة وإيتاء الزكاة.
Allaah iyo Rasuulkiisa iyo oogida Salaada iyo bixinta
Zakada (cidna kama qarsoona cidii iyada iska qariso
.mooyaanee oo iska indha tirta xaqiiqda jirta)

أهل الأوثان والقباب والقباب
Sheekha meeshaan su'aal ayuu nagu wada)
ma kuwa ah Ahalka (waydiinayaa wuxuu yiri
Asnaamta iyo Qubbadaha iyo kuwa dhileesta
واللواط والخمر والمنكرات،

iyo khaniisiinta iyo khamriyada iyo (dhamaan)
munkaraatka (Munkaraatkaan kuwa difaacaya oo u
,dagaalamaayo miyaa Allaah u dhaw)

أم أهل الإخلاص وإقام الصلاة وإيتاء الزكاة ... ؟ !!!
mise kuwa Ahlul ikhlaaska ah iyo Oogida Salaada iyo
Bixinta Zakada ahalka u ah?!!! (waa wax aan qofka
Muslimka ahi shaki kaga jirin in kuwaan dambe (kuwa

Ahlu ikhlaaska ah) ay yihiin kuwa Allaah u dhaw,
tolow muxuu noqon xukunka qofkii ogaada farqiga u
dhaxeeya labadaan kooxood ka dibna difaaca kuwa
.!xun, kuwa wanaagsana la dagaala, xaqira oo xasda?)

فالمتولي لضعدهم،

Midka ka gacal dhigtay lidkooda (wixii ka soo horjeeda
,oo aan ahayn Allaah iyo Rasuulkiisa iyo Mu'miniinta)

واضع للولاية في غير محلها،

qofkaasi waa mid dhigay gacal ka dhigashada meel
,aanan ahayn meesheeda (booskeeda)

مستبدل بولاية الله ورسوله والمؤمنين

waa mid ku bedelay ka gacal dhigashadii Allaah iyo
Rasuulkiisa iyo Mu'miniinta

المقيمين للصلاة المؤمنين للزكاة

oogta (toosiya) Salaada ee bixiya Zakada (wuxuu ku
bedelay Gacal tooyadaasi)

ولاية أهل الشرك والأوثان والقباب.

ka gacal dhigashada kuwa shirkiga sameeya iyo
.Asnaamta iyo Qubbadaha (kuwa ahalka u ah)

ثم أخبر تعالى أن الغلبة لحزبه ولمن تولاهم:

Ka dib Allaah koreeyee wuxuu sheegay in Guusha ay
u sugnaatay (ay leeyihiin) Xizbiga Allaah iyo Cidii
:ayaga ka gacal dhigata

{ومن يتول الله ورسوله والذين آمنوا}

Cidii Gacal ka dhigata Allaah iyo Rasuulkiisa iyo }

Kuwa Xaqa rumeeyey

فإن حزب الله هم الغالبون

}. .

**Xizbiga Allaah waa kuwa guulaysta (mar kasta gaar
. {ahaan marka ugu dambeesa**

الدليل التاسع عشر: قوله تعالى:

:Daliilka sideed iyo tobonaad: Qowlkiisa koreeyee

{ لا تجد قوماً يؤمنون بالله واليوم الآخر

ma helaysid qawm Rumaynayaan Allaah iyo maalinta }
aakhiro

يُؤَادُونَ مِنْ حَادِ اللَّهِ وَرَسُولِهِ

oo jecel cid la colaytantay (oo khilaaftay) Allaah iyo
,Rasuulkiisa

وَلَوْ كَانُوا آبَاءَهُمْ أَوْ أَبْنَاءَهُمْ أَوْ إِخْوَانَهُمْ أَوْ عَشِيرَتَهُمْ

Haba ahaadeen cidaasi aabayaashooda ama
wiilashooda ama walaalahooda (xaga nasabka) ama
. { qaraabadooda (qabiilkooda)

فَأَخْبِرْ تَعَالَى أَنْكَ لَا تَجِدُ مِنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ
Allaah koreeyee wuxuu sheegay inaadan helaynin qof
rumeeyey Allaah iyo Maalinta Aakhiro

يُؤَادُ مِنْ حَادِ اللَّهِ وَرَسُولِهِ وَلَوْ كَانَ أَقْرَبَ قَرِيبٍ،

oo jecel (xiriirinaayo) Cid la colaytantay (khilaaftay)
Allaah iyo Rasuulkiisa haba ahaato (cidaasi aan la
,jeclaaneenin) sukeeye midka ugu sukeeya

وَأَنْ هَذَا مُنَافٍ لِلْإِيمَانِ،

arinkaanina waa mid diidaya iimaanka (inuu qofka
gaalo jeclaado iyo iimaanka runta ah oo aan
,sheegadka ahayn way is diidayaan oo isma ogola)

مُضَادٌّ لَهُ،

waa mid ka soo hor jeeda iimaanka (arinka ah
jeclaanta Cida Allaah iyo Rasuulkiisa khilaafta oo la
jeclaado iyo iimaanka saxda ah way iska hor
,imaanayaan oo way iska soo horjeedaan)

لَا يَجْتَمِعُ هُوَ وَالْإِيمَانُ إِلَّا كَمَا يَجْتَمِعُ الْمَاءُ وَالنَّارُ.

ma kulmayaan arinkaasi iyo iimaanka illaa siday
Biyaha iyo Dabka u kulmaan mooyee (Biyo iyo Dabna
way is demiyaann ama way is gubaan habda kii badan
.ayaa xoog bata)

وَقَدْ قَالَ تَعَالَى فِي مَوْضِعٍ آخَرَ:

Dhab ahaantii Allaah koreeyee wuxuu meel kale
:(aayad) kale ku yiri

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا

kuwa xaq rumeeyayoow }

لَا تَتَّخِذُوا آبَاءَكُمْ وَإِخْوَانَكُمْ أَوْلِيَاءَ

ha ka yeelanina (ha ka dhiganina) Aabayaashiina iyo
Walaalihiina (xaga nasabka ah) Gacalo (sukeeyayaal
ha ka dhiganina, waa goormee? waa)

إن استحبوا الكفر على الإيمان

hadii ay Gaalnimada ka jeclaadaan (ay ka xigsadaan
,oo ay ka soo suko marsadaan) iimaanka

ومن يتولهم منكم فأولئك هم الظالمون،

Cidii ka gacalo (sukeeyo) dhigata kuwaasi oo adinka
,{ idinka mid ah kuwaasi ayaga uun baa Daalimiin ah

ففي هاتين الآيتين البيان الواضح

labadaan Aayadood waxaa ku jira oo ku dhex sugan
Bayaan (Dhambaal) Cad

أنه لا عذر لأحد في الموافقة على الكفر

oo ah inaan Axad (Qofna) cudur daar u lahayn (u
haysanin) ku waafaqida Gaalnimada (wax gaalnimo
keen sanaayo hadii la sameeyo)

خوفاً على الأموال والآباء والأبناء

sidaasina uu u sameeyo cabsi uu u cabsanaayo
darteeda Hantida iyo Aabayaasha iyo Caruurta

والأزواج والعشائر ونحو ذلك

iyo Xaasaska iyo Qarabada (ama Qabiilka) iyo wixii la
mid ah intaasi

مما يعتذر به كثير من الناس،

oo ka mid ah wax yaabaha ay ku cudur daartaan in
,badan oo Dadka ka mid ah

إذا كان لم يرخص لأحد في موادتهم،

hadaan qofna loo fasixin inuu Gaalada jeclaado (ama
,xiriiriyo oo uu soo dhaweesto)

واتخاذهم أولياء بأنفسهم

iyo gaalada oo uu ka dhigto (ka yeeshto) Gacalo
nafsadahoodana ay oga dhigtaan (sidaasina uu u
sameeyo qofka)

خوفاً منهم، وإيثاراً لمرضاتهم،

cabsi uu gaalada ka cabsanaayo, iyo doorid uu qofku doorto wixii gaalada raali gelinaayo (hadii aan qofna ,intaasi loo ogolaanin)

فكيف بمن اتخذ الكفار الأبعد أولياء وأصحاباً،

waa side (ka waran xaalka iyo xukunka) qofkii ka dhigta gaalada ka fog (xaga dhalashada ay ku kala fog yihiin Diinna warkeeda iskaba daayee) Gacalo iyo ,Saaxiibo yaal (ka dhigta)

وأظهر لهم الموافقة على دينهم

una muujiya gaalada inuu ku waafaqsan yahay Diintooda (sidaasina uu u sameeyo)

خوفاً على بعض هذه الأمور ومحبة لها؟!

cabsi uu u cabsanaayo qaar ka mid ah arimahaan (arimihii la soo sheegay) iyo jeclaan uu u qabo !?arimahaan (aduunyada xiriirka la leh)

ومن العجب

Waxaa la yaab leh (oo wax yaabaha lala yaabo ka mid ah)

استحسانهم لذلك

wanaag ka dhigashadooda ay wanaag ka dhigteen (sida ay wanaag ugu arkeen) kuwa gaalnimada ku dhacay arinkaasi (arinka ay gaalnimada ugu dhaceen darteeda)

واستحلالهم له،

iyo baneesashada ay arinkaasi (gaalnimada) baneesteen (nafsadahooda ayay ka baneesteen waana yaab in qofka xumaanta ku jira wanaag u fasirta ,xumaantiisa)

فجمعوا مع الردة استحلال الحرام

waxay ku dareen Diin ka noqoshadii inay baneestaan xaaraamtii (Diin ka noqosho + in la baneesto .waxyaabaha xaaraamta ah oo xalaal loo arko)

الدليل العشرون: قوله تعالى:

:Daliilka labaatanaad: waa Qawlkaa Allaah koreeyee

يا أيها الذين آمنوا لا تتخذوا عدوي وعدوكم أولياء

Kuwa Xaqa rumeeyow ha ka dhiganina (oo ha ka }
yeelanina) cadaawgayga iyo cadaawgiina (Gaalada)

Gacalo (sukeeyayaal iyo saaxiibo ha ka dhiganina)

تلقون إليهم بالمودة وقد كفروا بما جاءكم من الحق

oo aad u tuurtaan (u ridaan, u gudbisaan) xagooda
Jeclaanta (iyo xiriirinta), ayagoo ku gaaloobay wixii
,idiin yimid ee Xaqa ah

يخرجون الرسول وإياكم

waxay saarayaan (horena ay u saareen) Rasuulka iyo
Adinkaba (sababta ay idin saarayaan oo ay idin kula
dagaalamayaanna waxay tahay)

أن تؤمنوا بالله ربكم

inaad u rumeeseen darteeda Allaah Rabigiina ahaa

إن كنتم خرجتم جهاداً في سبيلي

hadii aad u baxdeen Jihaad Jidkeega ah

وابتغاء مرضاتي

iyo Dalbid aad dalbeesaan Raali ahaanshiyahayga
(Gaaloo Gacal ha ka dhiganina ilayn waa Cadaawgayga
,iyo cadaawgiinee isku cadaaw ayaanu nahnay)

تسرون إليهم بالمودة

waxaad u qarineesaan kuwaasi (Gaalada) Jeclaanta
(Gal gacalada oo wixii ayaga dan u ah ayaad u si
hoose iyo si kor ahba u siineesaan, jaajuusnimo)

وأنا أعلم بما أخفيتم وما أعلنتم

Anigana waxaan ogahay (Munaafiqiineey) waxaad
,qarsateen iyo waxaad muujisateenba

ومن يفعله منكم فقد ضل سواء السبيل.

ruuxii adinka idinka mid ah oo sameeya arinkaa
(Gaaloo soo dhaweesiga) wuxuu qofkaasi ka dhumay
wadadii sinnayd (toosnayd Jidkii Xaqa ahaa wuu ka
.dhumay qofkaasi)

فأخبر تعالى أن من تولى أعداء الله

wuxuu sheegay Allaah koreeyee in qofkii ka gacal
dhigta cadawyaasha Allaah

وإن كانوا أقرباء، فقد ضل سواء السبيل،

haba ahaadeen kuwo qaraabo la ah, inuu qofkaasi
dhab ahaantii uu ka dhumay wadadii toosnayd (ayuu
,Allaah sheegay)

أي خطأ الصراط المستقيم،

yacnii wuxuu gafay (qofkaasi oo uu dhinac maray)
wadadii toosnayd (ee Allaah iyo Raali ahaan
,shiyahiisa iyo Jannadiisa loo maraayay)

وخرج عنه إلى الضلالة.

wuxuuna uga baxay Jidkii toosnaa dhinaca Baadida
(Jidkii Baadida ayuu qaaday oo ibliis iyo Naar loo
.maraayay)

فأين هذا

halkee ayuu ka joogaa (ka taagan yahay) arinkaani
(Daliilkaan iyo Aayaatkaan halkee ayay ka mareen)

ممن يدَّعي أنه على الصراط المستقيم،

midka sheeganaayo inuu ku dul sugan yahay wadadii
,toosnayd (Islaamka/Xaqa)

لم يخرج عنه؟

uusan kaga bixin wadadii toosnayd (qofka (dhinacna)
.?ay sidaasi la tahay Aayadaan intee ka martay)

فإن هذا تكذيب لله،

Arinkaani (gaalo gacal laga dhigto iyo Muslim
Muwaxid ahna la colaadiyo waa arin wanaagsan oo
aan Diinka looga baxeenin qofka yiraahda) waa beenin
,Allaah la beeniyo

ومن كَذَّبَ الله فهو كافر،

,Ruuxii Allaah beeniyana waa Gaal (kaba waaween)

واستحلال لما حرم الله من ولاية الكفار،

waana baneesasho la baneestay wuxuu xarimay
,Allaah ee ah Gaalada oo gacalo laga dhigto

ومن استحلَّ محرَّماً فهو كافر.

.Ruxii baneestana wax xaaraam ah waa Gaal

ثم ذكر تعالى شبهة

Ka dibna wuxuu Allaah koreeyee sheegay Cudur daarka (Andacoodka, mar marsiinyaha iyo qiilka)

من اعتذر بالأرحام والأولاد

qofka ku cudur daarta Qaraabada iyo Caruurta (in uu dartooda dabinkaan Diin ka baxa ugu dhacay)

فقال:

Allaah wuxuu ka yiri (qofka cudurdaarkaasi la :yimaada)

{لن تنفعكم أرحامكم ولا أولادكم يوم القيامة}

waxba idin ma taraayaan Qaraabadiina iyo }

Caruurtiina Maalinta Qiyaamaha

يفصل بينكم

wuuna idin kala geenayaa (idin kala (Allaah) kaxeenayaa maalintaasi)

والله بما تعملون بصير

Allaahna waxaad camal faleesaan (aad .{sameeneesaan) wuu arkaa

فلم يعذر تعالى من اعتذر بالأرحام والأولاد

Allaah koreeyee uguma cudurdaarin ruuxii ku cudur daarta Qaraabada iyo Caruurta

والخوف عليها ومشقة مفارقتها،

iyo u cabsashada uu u cabsanaayay (Qaarabada iyo Caruurta) iyo (ku fikirida uu ku fikiray) dhibaataada ay leedahay kala tegida la kala tago Qaraabada iyo Caruurta (qofka arimaan la yimaada Rabi uma cudur daarin)

بل أخبر أنها لا تنفع يوم القيامة،

bal wuxuu sheegay in arintaasi aysan anfaceenin ,Maalinta Qiyaamaha

ولا تغني من عذاب الله شيئاً،

aysanna waxba uga deeqeenin (uga tareenin) ,Cadaabka Allaah

كما قال في الآية الأخرى:

:siduu Allaah ku yiri Aayada kaleento

{فإذا نفخ في الصور}

Marka la afuufo Suurka (Buunka) }

فلا أنساب بينهم يومئذ

ma jirto Nasab dhexdooda (isu nasab sheegasho ka dhaxeesa kuwa aduunka maanta xigto isugu ah ma jirto) maalintaasi

ولا يتساءلون

}. .

waxna isma warsadaan (oo kala yaac ayaaba ka jira .qofba qofka u dhaw ayuu ka sii carari og yahay)

الدليل الحادي والعشرون: من السنة ما رواه أبو داود وغيره،

Daliilka kow iyo labaatanaad: waa Sunnada xageeda ,wuxuu wariyay Abuu Daa'uud iyo Ghayrkiisaba

عن سمرة بن جندب عن النبي صلى الله عليه وسلم أنه قال:

waxaa laga wariyay Samurata Ibnu Jundub inuu ka :wariyay Nabiga SCW inuu yiri

{من جامع المشرك وسكن معه، فإنه مثله

}

Qofkii la kulma (ku biira) Mushriga (Gaalka) lana }
. {dega, qofkaasi Mushriga ayuu la mid yahay

فجعل صلى الله عليه وسلم في هذا الحديث من جامع المشركين،

Wuxuu ka yeelay Rasuulka scw Xadiithkaan dhexdiisa ,qofkii la kulma (ku biira oo ku milma) Mushrikiinta

أي اجتمع معهم وخالطهم وسكن معهم مثلهم،

yacnii Gaalada qofkii la kulma kuna milma meelna la ,dega waa la mid (ayagoo ka mid yahay)

فكيف بمن أظهر لهم الموافقة على دينهم

waa sidee (ka waran xaalka iyo xukunka) qofkii u muujiya gaalada waafaqsanaanta uu ku waafaqsan yahay Diinkooda

وآواهم وأعانهم؟ !

soona dhaweeya gaalada una kaalmeeya (waa side !?xaalka iyo xukunka qofkaan)

فإن قالوا: خفنا،

Hadii ay yiraahdaan (kuwa gaalada soo dhaweestay ay ,ku andacoodaa): waan cabsanay

قيل لهم: كذبتهم.

.waxaa lagu dhahayaa: been baad sheegteen

وأيضاً فليس الخوف بعذر،

,Sidoo kale Cabsidu ma ahaanin Cudur daar

كما قال تعالى:

:siduu Allaah koreeyee yiri

{ومن الناس من يقول آمنا بالله

Dadka waxaa kamid ah Cid dhaheeso waxaan }

,rumeenay Allaah

فإذا أودى في الله

markii lagu dhibaateeyo Allaah dartiisa (rumeenta

Allaah darteeda hadii ay dhibaato ku soo gaarto)

جعل فتنة الناس كعذاب الله

wuxuu ka dhigaa imtixaanka Dadka (dhibka ay Dadka

,{u geesanayaan) sida Cadaabka Allaah oo kale

فلم يعذر تبارك وتعالى من يرجع عن دينه

uma cudur daarin Allaah Barako badnaayee kor

ahaayeena Ruuxii ka noqda Diinkiisa

عند الأذى والخوف،

,markay ay Dhibaatada iyo Cabsida ay jirto

فكيف بمن لم يصبه أذى ولا خوف؟ !

waa sidee (ka waran xaalka iyo xukunka) qofka aysan

!ku dhicin wax dhibaato ah iyo cabsi midna

وإنما جاؤوا إلى الباطل محبة له

Waxay uun ugu imaadeen (ugu tageen) Baadilka

jeclaan ay u qabaan baadilka darteeda

وخوفاً من الدائرة.

.iyo cabsi ay ka cabsanaayeen musiibooyinka

والأدلة على هذا كثيرة

Daliilooyinka tusinaaya arinkaan (arinka uu kitaabka

ka hadlaayo ee ah Ad-dilada ku saabsan Murtadka)

وفي هذا كفاية لمن أراد الله هدايته.

.intaan ayaana ku filan Ciduu Allaah la doono Hanuun

وأما من أراد الله فتنته وضلالته،

Ciduu Allaah doonana Fitnadiisa iyo Baadidiisa
,(waxba uma tari kartid adiga)

فكما قال تعالى:

:siduu yiri Allaah kor ahaayee

{إن الذين حقت عليهم كلمة ربك لا يؤمنون*
kuwa ay ku waajibtay (ku laazimtay) Kelimadii }
*Rabigaaga (Cadaab) ma rumeenaayaan (Xaqqa)
ولو جاءتهم كل آية حتى يروا العذاب الأليم
}.

xitaa hadii ay u timaado Aayad kasta (Xaqa ma
rumeenaayaan) ilaa ay ka arkaan Cadaabka Xanuunka
. {badan

ونسأل الله الكريم المنان

waxaan waydiisaneenaa Allaaha Sharafta badan (wax
bixiska badan) ee Abaal gelida badan (Galadda badan)

أن يحينا مسلمين،

,inuu na nooleeyo anagoo Muslimiint ah

وأن يتوفانا مسلمين،

iyo inuu na oofsado (nafta naga qaado) anagoo
,Muslimiin ah

وأن يلحقنا بال صالحين،

iyo inuu na haleeshiiyo (naga daba geeyo, nala
kulmiyo) Saalixiinta (kuwa suu suuban ee wan
,wanaagsan)

غير خزايا ولا مفتونين،

,anagoon nala hoojinin oo aan nala fitneenin

برحمته وهو أرحم الراحمين

Allaah Naxariistiisa (ayaan ku waydiisaneenaa
arinkaasi) Allaahna waa Midka ugu naxariista badan
.inta naxariisata

وصلى الله على محمد وآله وصحبه وسلم آمين

**Nabad galyo iyo Naxariis/Amaan Nabi Muxammed
dushiisa iyo Ahalkiisa iyo Asaxaabtiisa ha ahaato
.Aamiin (Allaw aqbal)**

**Walaalahayga aan Islaamka ku walaalawnayow
Kitaabkii Ad-dalaa'il fii xukmi mawaalaati Ahlil ishraak
meeshaani ayuu noogu dhamaaday, wixii aan haleelay
sax iyo wanaag ah Allaah ayaa ii sakhiray, wixii aan
dhinac maray oo aan khaldayna waxay ka timid
Nafsadayda gaabiska badan, Camal kasta oo Rabi
raali ka yahay oo aan sameenaynana mid aan Allaah
Ridahiisa ku dalbeeno Allaah nooga dhigo, Culimadii
aan ka faa'iideesanayna miisaankooda xasanaadka ah
Allaah ha u saaro, intaasi ka dib wixii aan baranay ku
camal falkooda ayaa ina hor yaalo hada iyo wixii ka
dambeeya iyo inaan Dadka gaarsiino iyo inaan ku
sabirno wixii caqabado ah oo aynu kala kulano
.arinkaasi**

**Waa walaalkiina aad Diinta ku walaalawdeen oo idinka
dalbanaayo inaad Allaah uga baridaan Asiga iyo
Ahalkiisa iyo Culimadii uu wax ka bartay iyo kuwa uu
wax ka baran doonaba inuu waafajiyo Aduun iyo
Aakhiro wuxuu Allaah raali ka yahay Ayagana ay
.Raali ka yihiin**

**Wixii su'aal, sixid ama suluugmo ah oo ku saabsan
Kitaabkan fadlan ku soo hagaaji emailkan :
shaakir123@hotmail.com**

والله أعلم ، صلى الله على محمد وآله وصحبه وسلم